MAJALADDA MARAG
Cadadka Sideedaad | Nov 2025

# XASAASIYADA SIYAASADEED EE SOOMAALIYA EE KA DHALATAY E-VISA:

## Khilaafka Cusub ee Dowladda Federaalka iyo Maamulada Soomaaliyada

Cabdiraxmaan Shiikhdoon

Bogga: 41




Xigashada Sawirka: AI

# Qorayaasha Majaladda




**Cabdulahi Faarax Mire**
Caqabadaha_Hirgelinta_Federalism 4



**Bashiir Suuleey**
Tahriibka Dhallinyarada Puntland: Da'yar La Dayacay 7




**Dr. Maxamud Hoorri**
DHEESHA JUQRAAFI-SIYAASADEEDKA (GEOPOLITICS) IYO FARAGELINTA SHISHEEYE 11




**Axmed Siciid Nuur**
Q2: 27 Sano Kadib: Puntland ma u baahan tahay dib-u-habayn siyaasadeed, 18



**Cali Xaaji Warsame**
MAXAA LOO WAAYEY HAL MADAXWEYNE OO SAXA? 22



**Cabdiraxmaan Maxamuud**
Boosaaso: Magaalo Fursad Haysata oo La Daalaa Dhacaysa Maamul Fadhiid Ah 27



**Asmaa Sh. Cabdulqaadir**
Xannaanadda Carruurta: Aasaaska Mustaqbalka Waxbarashada Puntland 31



**Maxamed Showkaani**
Nidaaminta nolosha iyo aragtida Islaamka 35



**Dr. Maxamed Cali Faarax**
Dowlad-dhiska iyo ku dhaqanka sharciga 38



**Cabdiraxmaan Shiikhdoon**
XASAASIYADA SIYAASADEED EE SOOMAALIYA EE KA DHALATAY E-VISA 41

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno daabacaadda sideedaad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed aan ugu talaggalnay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Majalladda Marag, oo la qorsheeyay in la daabaco hal mar bishii, waxaa aasaasay xarumaha ku midaysan Iskaashiga Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Newsrooms Coalition – SNC). Iskaashigan wuxuu ka kooban yahay xarumo kala duwan, kuwaas oo kala ah: Milgo Media, Puntland Mirror, The Daily Somalia, Dookh Press, iyo Gaashaan Dialogue.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Cadadkan waxa uu ka koobanyahay mowduucyo kala duwan oo diiradda saaraya siyaasadda, tiknoolajiyada iyo arrimaha bulshada kuwaas oo ay qoreen khubaro aqoon iyo waayo-aragnimo ballaaran u leh qaybahan.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# CAQABADAHA HIRGELINTA FEDERALISM-KA SOOMAALIYA: FALANQAYN CILMIYEED



Cabdullahi Faarax Mire



**Xigashada Sawirka**: Facebook

# HORDHAC: FAHAMKA FEDERAALKA

Federaaliisim-ku waa hannaan siyaasadeed oo awoodaha si dastuurka ku cad loogu qeybiyo dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada, iyadoo mid kastaba ay leeyihiin awoodo iyo xeerar u gaar ah, guud ahaanna labada heer waxay wadaagaan talada qaranka. Hase ahaatee, dabeecadda nidaamka federaalku waa mid qabyo ah, doodihiisuna ay furanyihiin, una baahan maan siyaasadeed oo debecsan aqbali karana isbedel lagu sameeyo markii loo baahdo. Run ahaantii, qaladka u weyn ee federaalka laga galo waa in loo arko hannaan hal-jid ah, ama hal qaab leh, iyadoo uu yahay nidaam firfircoon (Dynamic), oo u baahan hal-abuur, wada-tashi joogto ah, iyo is-bedel ku saleysan baahida dalka iyo geedi-socodka dowlad dhiskiisa.

Dhowaan, Buug ka hadla Federalism-ka casriga ah, oo cinwaankiisu yahay "Qaab-dhismeedyada Federaalka ee Soo Baxaya Kadib Dagaalkii Qaboobaa" "Emerging Federal Structures in the Post-Cold War Era" oo la daabacay sanadkii 2022, ayna tifaftireen Soeren Keil iyo Sabine Kropp, ayaa si qoto dheer u falanqeeyey dalal kala duwan oo hannaankan qaatay sida Belgium, Spain, Russia, Ukraine, Balkans, Nepal, Myanmar, India, Iraq, Syria, Ethiopia, South Africa, Kenya, Colombia, iyo Midowga Yurub. Falanqaynta Buugu waxa ay xoojinaysaa in federalism-ku dal walba uu leeyahay wajiyo gaar ah oo la jaanqaadaya duruufaha deegaanka, dhaqanka, qowmiyadaha, iyo taariikhda. Sidaas darteed, mar walba federalism-ka waxaa la socda is-bedel, mararka qaarna waa mid aan dhammeystirneyn ama aan taabba-gal ahayn.

Buugu sidoo kale waxa uu tilmaamayaa in guusha nidaamka federaalka ay sal u tahay helitaanka hannaan ku dhisan caddaalad, khilaafaadka ka dhashana lagu xallin karo si wadar-ogol ah, isla markaana ay fududahay in dib u eegis lagu sameeyo markasta oo baahi la xiriirta soo baxdo. Wacyigelinta bulshada oo la xoojiyo iyo albaabada wada-hadallada iyo doodaha federaalka oo furan, ayaa waxtar weyn u leh hirgelinta federaal taaba-gal ah.

# FEDERAALKA SOOMAALIYA: MAXAA QALDAN?

Haddaba, Federalism-ka Soomaaliya waa hannaan dhisme dowladeed oo la qaatay xilli ay dalka ka jireen burbur, colaado iyo kalsooni darro siyaasadeed, looguna talagalay in uu u adeego nabadda iyo dib-u-dhiska hay'adaha dowladda. Si kastaba ha ahaatee, hirgelintiisa waxay la kulantay caqabado waaweyn oo siyaasadeed, dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo amni, iyadoo ay ka dhalatay doodo cilmiyeed oo aqoonyahanka Soomaaliyeed iyo ajaanibtuba ay si gaar ah u muujinayaan sababaha uu hanaankani uga hirgali la'yahay dalka Soomaaliya si dhamaystiran.

Ugu horrayn, caqabadaha siyaasadda ayaa noqday kuwa ragaadiyey hirgelinta nidaam federal ah oo waxtar u leh dalka. Dhib weyn ayaa ka jirta kala xadaynta awoodaha u dhexeeya dowladda dhexe ee federaalka iyo dowlad goboleedyada, iyadoo aan si dhab ah looga heshiin, taasoo keenta isqabqabsi joogto ah iyo khilaafaad siyaasadeed oo aan dhammaan. Guud ahaan, xasillooni la'aanta siyaasadeed ee dalku, waa mid salka ku haysa kalsooni-darrada ka jirta heerarka kala duwan ee dowladda. Dhan markii laga eego, dowladda dhexe ayaa mamar badan u muuqata mid rabta in ay talada dalka maroorsato, halka dowlad goboleedyaduna ay dhankooda rabaan in ay u jiitaan awoodo badan oo ay leedahay dowladda dhexe. Dhabta marka loo hadlo, loolankaasi waa mid salka ku haya danaha qabaa'isha ee isdiidan, taas oo caqabad weyn ku ah wacyiga iyo hirgelinta Federaalka Soomaaliya.

Furaha xalka caqabadaha siyaasadeed ee kalsoonida abuuri kara, waa mid ku xiran in si wadar-ogol ah loogu heshiiyo hannanka awood qaybsiga heerarka kala duwan ee dowladda, kaddibna loogu qeexo dastuurka. Run ahaantii, way adagtahay in la gaaro xalkaas, haddii aan albaabada loo furin wadahadallo dhab ah iyo doodo siyaasadeed oo lagu bisleeyo heshiis siyaasadeed oo dhaqan gal ah.

Marka xigta, Soomaaliya waxay horumar ka samaysay dhismaha hay'adaha federaalka maaliyadda, laakin weli waxaa jira caqabado badan oo ay ka midtahay: qaybsiga aan caddayn ee dakhliga iyo kheyraadka, khilaafaadka siyaasadeed, iyo isku xirka liita ee dowladda dhaxe iyo dawlad goboleedyada. Tusaale ahaan, qaybsiga khayraadka dabiiciga ah, in kasta oo laga sameeyey is-afgaradyo kala duwan (sida heshiisyada Baydhabo, Shidaalka, kalluumaysiga), haddana kalsooni-darrada siyaasadeed ayaa haraysay dhaqan-gelinta heshiisyadaas. Nasiib darro, siyaasadda dalku waxa ay noqotay mid aan ku dhisnayn sharci, balse inta badan ay saamayn taban ku yeelato loolanka awoodeed ee u dhexeeya hogaamiyaasha siyaasadeed. Ma jirto aragti ama hiigsi ka dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda, ama dedaal loo dhanyhay oo lagu hormarinaayo dhaqaalaha iyo khayraadka dalka.

Taas ayaa dhalisay, in aan ilaa hadda laga hirgelin dalka nidaam canshuureed iyo maamul dhaqaale oo mideysan oo la isku raacsanyahay. Fashilkaas weyn waxa uu kordhiyay ku tiirsanaanta deeqaha caalamiga ah iyo in aan horumar muuqda laga gaarin kobcinta dakhliga dalka. Haddii aan siyaasadda laga heshiin, waa adagtahay, dhaqaalaha oo ka xasaasiyad badan in guulo laga gaaro.

Intaas waxaa dheer, caqabad kale oo la xiriirta faham xumada federaalka oo ah mid baahsan heer bulsho iyo heer hoggaan siyaasadeedba. Dadweynaha intooda badan iyo siyaasiyiinta qaarkood kama haystaan faham dhammeystiran hanaanka federaalka. Siyaasadda iyo doodaha federaalka waxaa hareeyey laba cabsiyood oo kala ah in federaalku yahay hannan dalka kala goynaya iyo aragti oranaysa federaalku waa "hindise shisheeye". Labadaas aragtiyoodba waxa ay caqabad ku yihiin hirgelinta nidaamkaan. Bisaylka bulsho ayaa saldhig u ah federaal hana-qaad ah. Kala qaybsanaanta bulshada iyo loolanka u dhexeeya qabaa'ilka waa khatar joogta ah, oo u baahan in la kobciyo fahamka Federaalka, si loo afjaro khilaafaadka dastuuriga ah ee dhiiri gelinaaya fahmkaan qalloocan.

Sidoo kale, amniga iyo dib-u-dhiska hay'ado amni oo mideysan ayaa ah caqabad kale oo ragaadisay hirgelinta hannaan federaal oo waxtar leh. Waxaa xusid mudan, in Qaab-dhismeedka Amniga Qaran ay si wadajir ah u saxiixeen dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka sanadkii 2017. Hase ahaatee, khalifaadka siyaasadda iyo kalsooni-darrada ka dhaxaysa hoggaamiyaasha siyaasadda dalka ayaa curyaamisay hirgelintiisa. Waxaa nasiib darro ah, in khataraha jiritaan ee ka imaanaaya kooxaha hubaysan ee argagixisada sida Al-Shabaab iyo Daacish, aynan dardar gelin fulinta heshiiskaan muhiimka ah, balse ay fursad siisay in ay sii ahaadaan Kansar caqabad ku ah hirgelinta hay'adaha federaalka, gaar ahaan, qabashada doorashooyinka, fulinta sharciyada, iyo bixinta adeegyada bulshada.

Intaa waxaa dheer, qabyo-tirka aasaaska hay'adeed ee hannaan federaal oo hanaqaad ah. Dhismaha hay'adaha federaalka ee socda ayaa weli ah mid aan si buuxda loo dhammeystirin, mana jirto maxkamad dastuuri ah oo si madax-bannaan u xallisa khilaafaadyada ka dhasha qeybsiga awoodaha, sidoo kale, waxaan weli heshiis lagu ahayn dhamaystirka dastuurka, hay'ado badan oo federaal oo la dhisayna, waxaa caqabad ku ah isku xirka iyo wadashaqaynta heerarka kala duwan ee dowladda.

Waxaa caqabadahaas oo dhan dheeri ku ah, aragti la'aanta siyaasiyiinta heerarka kala duwan ee dowladda, siyaasadda ku dhisan rag iska dhiciska, kala shakiga, loo joojin mayo, jilbaha dhulka haloo dhigo iyo niyad xumida xanbaarsan himilooyan gurracan. Waa hubaal, in heshiiska siyaasadeed uu fure u yahay xalinta caqabadaha federaalka, laakiin kuma imaan karo geedi-socod hal dhinac ka raran, oo aan heshiis lagu ahayn. Hoggaamiyihii aragti fog ka leh dalkaan, waa midka waqti ku filan galiya midnimadiisa, wadajirka bulshadiisa, iyo hirgalinta heshiisyo siyaasadeed oo dhaxal-gal ah, waxaana saldhig u ah dastuur wadar-ogol ah, oo loo dhanyahay, lana wada leeyahay.

## GUNAANAD IYO TALOOYIN

Federalisim-ku wuxuu keenay kala duwanaansho aragtiyeed oo ballaaran, welina waa qabyo. Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in la xoojiyo dib-u-eegista dastuur loo dhanyahay, la kala qeexo awoodaha heerarka kala duwan ee dowladda, lana jaangooyo qaybsiga khayraadka, isla markaana la dhiso hay'ado federaal oo heshiis lagu yahay oo ku dhisan caddaalad.

Sidoo kale, waa in fahan la'aanta federalism-ka qaybta weyn ka qaadata sii socoshada khilaafaadka la garawsadaa, lana abuuraa kalsooni iyo wacyi siyaasadeed. Federalism-ku waa hannaan loo adeegsan karo midnimada bulshada, dib-u-dhiska iyo nabadeynta, iyadoo la mideynayo awoodaha hay'adaha dowladda, lana fududeynayo doodo iyo wadahadalo miro dhal ah.

**W/Q:** Cabdullahi Faarax Mire

**Xagasho:**


1. Ali, A. Y. S., Dahir, A. H., & Hersi, Z. D. (2019). Federalism in post-conflict states: Assessing Somalia's challenges and the way forward. Perspectives on Federalism, 11(2).

2. Barre, G. S. (2024). Weaknesses of federalism in Somalia and required reforms. East African Journal of Arts and Social Sciences.

3. Hassan, A. A., Hussein, A. M., Osman, S. A., Hussein, A. M., Ahmed, A. H., & Osman, A. M. (2025). Fiscal federalism in Somalia: Opportunities and challenges.

4. Keil, S., & Kropp, S. (Eds.). (2022). Emerging Federal Structures in the Post-Cold War Era. Cham: Palgrave Macmillan.

# TAHRIIBKA DHALLINYARADA PUNTLAND: DA'YAR LA DAYACAY



Bashiir Suuley



**Xigashada Sawirka**: Facebook

# HORDHAC

Tahriib waa eray asal ahaan ka soo jeeda afka Carabiga, gaar ahaan erayga "haraba", oo macnihiisu yahay "cararay" ama ula dhuumaalaysi shay si aan sharci ahayn. Waxaa kale oo lagu macnayn karaa la baxsi ama in shay si aan sharci ahayn loola fakado. Tahriibku wuxuu ku saabsan yahay safar ama socdaal qarsoodi ah, kaas oo qofku si sharci darro ah ugu gudbo meelo uusan fasax u haysan.

Tahriibku waa dhibaato caalami ah, waxaana uu saameeyaa dhinacyo badan oo nolosha bulshooyinka ah. Soomaaliya, gaar ahaan Puntland, ayaa ka mid ah meelaha ay dadku inta badan ka tahriibaan, iyadoo magaalooyinka waaweyn sida Gaalkacyo iyo Garoowe ay yihiin xarumaha ugu badan ee laga baxo sida ay ii sheegeen dad badan oo horay uga tahriibay oo aan waraystay. Maqaalkaan waxa aan ku eegi doonnaa sababaha ugu waaweyn ee riixa dhallinyada waddanka ka sii qulqulaysa, qaababka kala duwan ee ay dalka uga baxaan iyo sida arrintaas wax looga qaban karo.

Sababaha Dhallinyarada Soomaaliyeed u Tahriibaan

Waxaa jira qodobo badan oo loo aaneeyo tahriibka dhallinyarada ka haajiraya dalkooda. Qodobbadan ayaa ah kuwo si joogto ah u saameeya go'aankooda socdaalka, waxaana halkan ku soo qaadan doonnaa qaar ka mid ah sababaha ugu waaweyn ee saldhigga u noqda tahriibka dhallinyarada.

# 1. DHAQAALE XUMO IYO SHAQO LA'AAN

- Cilmibaaris uu sameeyey Heritage Institute oo ciwaankeedu yahay Tahriibka dhallinyarada Soomaaliya ayaa xustay in 69% dhallinyaradu sheegeen in sababta ugu weyn ee ay dalka uga baxaan ay tahay dhaqaale la'aan iyo fursadaha shaqada oo aad u xaddidan.
- Darsaasad kale oo isla tahriibka ah ayna qoreen Dr. Mohamud Ali iyo Omar Muhumed ayaa iyana sheegaysa in 77% dhallinyarada Gaalkacyo ay shaqo la'aan yihiin, halka isla cilmibaaristaas 54% dhallinyada ka mid ah ay xuseen in fursadaha shaqada ee magaalada ka jirta ay yihiin kuwo aad u yar, arrintaasna ay tahay sababta ugu weyn ee riixda tahriibka dhallinyarada.

# 2. DOORKA MUKHALASIINTA

Baryahaan dambe waxa ayba noqotay in tahriibintii aan lala gabban ee toos loo ka xeeyo dhallinyarada oo xitaa kuwa aan hammigu ku jirin lagu abuuro si lacag looga helo. Arrintaasna waxaa fududeeya shabakado isku xiran oo tahriibinta dadka ka shaqeeya. Waxa ay leeyihiin kooxo dadka soo dhiirigeliya oo dhallinyarada hiyi-kac ku rida oo qaarkood ay adeegsadaan baraha bulshada kuwana toos dhallinyarada u abbaaraan. Marka lagu qanciyo waxaa dhacda in tahriibaha laga doonayo in uu diyaar ahaado oo loo fududeeyo wax kasta oo uu u baahanyahay. Tusaale; haddii la rabo in diyaarad la saaro waxaa loo samaynayaa baasaboor, fiise ayaa loo soo saarayaa, tigidkana waa loo jarayaa. Dhammaan lacagahaasna waxaa bixinaya isla shabakadda. Waxaana lacagtii iyo mid kale oo aad u faro badan qofka laga rabaa kolkii Liibiya ama Aljeeriya la geeyo.

# 3. SAAMEYNTA EHELKA AMA SAAXIIBBO HORE OO TAHRIIBAY

Waxaa kale oo dhallinyarada tahriibaysa saameyn ku yeesha saaxiibbo hore oo tahriibay iyo xitaa qeyb qoyska ka mid ah oo sabab u noqda in ay dhallinyaradu tahriibaan. "Walaalkay iga yar ayaa aan u samaynayaa baasaboor si aan u tahriibiyo uuna qoyska ugu soo shaqeeyo maadaama uusan dalka waxba ku hayn" ayaan ka qoray nin dhallinyaro ah oo iiga warramayey xaalka walaalkiis oo uu rabo in uu dalka ka ka xeeyo. Daraasadda Tahriibka ee dhallinyada Gaalkacyo ay ka qoreen Dr. Mohamud Ali iyo Omar Muhumed ayaa sidoo kale xusaysa in 67% ka mid ah dhallinyarada ay yaqaannaan saaxiibbo hore oo tahriibay kuwaas oo baraha bulshada ku soo bandhiga sawirro qurxoon oo ay ku soo galeen dalalkii ay tageen.

# 4. AMNI XUMO IYO KHATARO BULSHO

Qeyb ka mid ah dhallinyarada ayaa sabab uga dhiga safarkooda arrimo amni la xiriira, ha noqoto aano qabiil ama amni-darro kale oo ay dareemeen. Sida ku xusan cilmibaarista Heritage Institute 18% dhallinyarada ayaa u tahriiba arrimo amniga noloshooda quseeya.

# 5. RAJO XUMO DALKA AH

In badan oo ka mid ah dhallinyarada ayaa aad uga niyad jabsan xaaladda guud ee dalka heer kasta ay tahay. Xaaladda amni, dhaqaale, iyo dhan kasta oo nolosha ah ayay quus ka muujinayaan. Dhanka kale eexda, nin jecleysiga iyo u sinnaan la'aanta dhallinyarada ee fursadaha yar ee shaqo ee jira ayaa iyana ka mid ah arrimaha ay dhallinyaradu cabashada xooggan ka qabaan. Arrimahaas ayaana qeybtood ku khasba in ay safar halis badan naftooda ku halligaan.

# MARINADA FUDUDEEYA TAHRIIBKA DHALINYARADA

Inta badan yoolka dhallinyarada Soomaaliyeed ee tahriiba waa in ay gaaraan qaaradda Yurub. Iyaga oo sii maraya badda Miditereeniyanka. Jidka ugu caansan ee loo maraana waxa uu ahaan jiray jid dheer oo halistiisa wata kaas oo looga baxo Soomaaliya si Itoobiya loo gaaro, Suudaana looga sii gudbo, Saxaraha la maro, Liibiya, ka dibna badda. Jidkaasu weli waa sidiisii waana uu ka dhib badanyahay sidii hore oo hadda waxaaba dheer in dadka looga soo duubo muuqaallo aragaggax leh. Safarka intaas le'eg ilaa Saxaraha laga gaarayo waxaa garwadeen ka ah mukhalasiinta dadka tahriibiya oo isku xiran Soomaaliya ilaa Liibiya kuwaas oo si joogto ah dhallinyarada uga rara magaalooyinka waaweyn. Puntland, magaalada Gaalkacyo ayaa ah marinka ugu weyn ee dhallinyaradaas la mariyo.

Marinadii hore waxaa ku darsantay mid kale oo ka casrisan. Waana in la raaco diyaarad. Si safarkaas loo guda-galo mukhalasiintu waxa ay qofka u diyaariyaan wax kasta oo uu u baahanyahay, iyaga oo xitaa u sameeya waalid been abuur ah oo garoomada diyaaraha ka furdaamiya haddii lagu qabsado. Inta badan baasboorrada xitaa waxaa loogu qoraa magacyo been abuur ah si haddii la baaro aan magaca qofka loo sii helin. Xogo aan ka helay dad badan oo aan waraystay oo maray safarka cirka ah waxay ii sheegeen in garoomada ugu badan ee laga dhoofaa ay yihiin Garoowe iyo Muqdisho.

# XALKA KA HORTAGGA TAHRIIBKA DHALLINYARADA

Tahriibka dhallinyarada Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa ka baxa Puntland, waa arrin saamayn ballaaran ku yeelatay qoysaska, dhaqaalaha iyo mustaqbalka bulshada. Inkasta oo sababaha tahriibku ay yihiin kuwo isbiirsaday haddana xaqiiqadu waxay tahay in tahriibku uusan ahayn doorasho ay dhallinyaradu ku faraxsan yihiin, balse ay aamminsanyihiin in ay doorasho kale waayeen. Haddaba si arrinta tahriibka si qumman loogu wajo waa lagama maarmaan in la helo tallaabooyin arrintaas wax looga qabanayo sida:

**1. Abuuridda Fursado Shaqo iyo Xirfado Macno Leh**

- Dowladda Puntland waa in ay diiradda saartaa abuuridda shaqooyin iyo mashaariic dhalinyaradu ka faa'iideysan karto, si meesha looga saaro caqabadda ugu weyn ee ah shaqo la'aanta dhallinyarada.
- In la ballaariyo xarumaha tababarka farsamada gacanta isla markaana lagu xiro suuqa shaqada si dhallinyaradu u helaan nolol ay tahriibka ku beddelan karaan.

**2. Xakamaynta Shabakadaha Mukhalasiinta**

- Waa in si wadajir ah ay u hawlgalaan booliska, hay'adaha sirdoonka, maamullada gobollada, degmooyinka, laamaha socdaalka iyo cid kasta oo ay qusayso, si loo burburiyo shabakadaha tahriibka ee ka hawlgala magaalooyinka waaweyn siiba Gaalkacyo iyo Garoowe kuwaas oo qeyb weyn ka ah tahriibinta dhallinyarada.
- In la ansixiyo sharciyo adag oo ka dhan ah dadka tahriibka fududeeya iyo tahriibayaashaba si loo xakameeyo qulqulka dhallinyarada.

**3. Horumarinta Amniga iyo Xasiloonida**

- Xasilinta amniga guduhu waa qodob kale oo muhiim ah siiba magaalada Gaalkacyo oo dhallinyaro badan oo ka tahriibay ay xusayaan in ay amni-darro darteed naftooda ugala baxeen. Amniga waxaa kale oo ku xiran dhammaan horumarka kale ee abuuri lahaa fursadaha shaqada ee meesha ka saari lahaa cabashada la xiriirta shaqo la'aanta baahsan ee deegaanka ka jirta.

**4. Hufnaan iyo caddaalad**

- "Waxa aad ku dartaan qofkii booska loo qaadan lahaa waa diyaarsanyahay" oraahdaas kooban waxa aan arkay iyada oo dhallinyaro tiro-beel ahi ay faallo ahaan uga dhiibanayaan akoomada baraha bulshada ay ku leeyihiin hay'adaha dowladda iyo xitaa kuwa gaarka loo leeyahay marka ay soo xayeysiiyaan boosas shaqo oo ka bannaan. Oraahdaasna waxa ay ku tusaysaa sida dhallinyaradu aysan marna kalsooni ugu qabin in fursadaha yar ee jira aan loo sinnayn oo inta shaqada la baahiyo haddana qof hoos laga qaato. Haddaba waa in la helaa nidaam caddaalad ah oo arrintaas lagu xallin karo.

## GUNAANAD

Ugu dambeyntii waxaa nasiib-darro weyn ah in hay'adaha kala duwan ee dowladda Puntland aysan ilaa iyo hadda qaadin tallaabooyin wax ku ool ah oo wax looga qabanayo qulqulka tahriibka dhallinyarada deegaanka sida xowliga ah uga tagaya. Warka ugu weyn ee laga maqlayna uu yahay hadal madaxweyuhu jeediyey oo laga soo qaatay qayb yaab leh nuxurkeeduna ahaa: "Haddii aydaan tahriibka daynayn dabaasha barta"! xilligaan la joogo arrinta tahriibku waxa ay u baahantahay in si dhab ah loo wajaho dhammaan dadka ay qusaysana iska kaashadaan sidii arrintaas xal loogu heli lahaa.

Allaa Mahad Leh

Dhammaad

**W/Q:** Bashiir Suuley

# DHEESHA JUQRAAFI-SIYAASADEEDKA (GEOPOLITICS) IYO FARAGELINTA SHISHEEYE



Dr. Maxamuud C/Raxmaan Maxamuud



Xigashada Sawirka: AI

# 1. HORDHAC: MARIN ISTARAATIIJI AH

Geeddi socodka kasoo kabsashada dagaalkii sokeeye iyo hayaanka dowlad-dhisidda cusub waxaa gun uu ku qotomo u ah si weliba xeel dheer juquraafi-istaraajiyadeedka (strategic geography) Soomaaliya, hardanka siyaasadda dibadda iyo faragelinta shisheeye ee ku xeeran. Soomaaliya waxa ay juqraafi ahaan dhacdaa mowqic istaraatiiji ah, waana dhuunta halbowlaha u ah kala goosha badaha oo ay iska galaan Gacanka Cadmeed (Gulf of Aden) iyo Badweynta Hindiya (Indian Ocean). Waxa ay ku fadhidaa isgoys muhiim u ah ganacsiga badeecadaha isaga gudba dunidda inteeda kale (Global Maritime Trade). Mowqicaan istaraatiijiga ah, oo ah marinka ay maraakiibtu ugu tallaabaan Kanaalka Suweys, waxay ka dhigaysaa xasilloonida Soomaaliya mid aan ahayn mid khusaysa arrimaha gudaha oo keliya balse saamayn wayn ku leh ganacsiga iyo amniga dunida inteeda kale.

Sanadihii la soo dhaafay, qiimaha istiraatiijiyadeed mowqica juqraafiyadeed wuxuu Soomaaliya u rogay goob lagu hardamo, looguna baratamo "Dheesha Juqraafi-Siyaasadeedka (The Game of Geopolitics)" iyo loolanka quwadaha shisheeye ee ka leh Soomaaliya damaca dhaqaale-siyaasadeed (Economo-Politics). Dheeshaani waxay keentay in awoodaha gobolka (Regional Powers), boqortooyooyinka Khaliijka (Gulf Monarches), iyo dowladaha waaweyn ee Reer Galbeedku ay ku tartamaan sidii ay saameyn wayn, heshiisyo dhaqaale, saldhigyo ciidan iyo iskaashi amni ula yeelan lahaayeen xukuumadaha tabarta iyo taagta daran ee Soomaaliya (Dowladda Dhexe, DFS iyo Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ahba, DXF).

Faragelinta iyo loolanka shisheeyaha, taakulada iyo heshiisyada quwadaha gobolka iyo Reer Galbeedka, waxaa lagu sifayn karaa seef laba af leh (Double-Edged Sword). Dhinac marka laga eego, la falgalkani wuxuu keenayaa kaalmo muhiim ah sida suggidda aminga caasimadda, maalgelinta dib-u-dhiska hay'adaha dowladda, iyo bixinta gargaar bani'aadamnimo. Dhinac kale marka laga fiirshana, la falgalka dibbada wuxuu keenay lakabyo isku dhafan oo dhaawacay siyaadada (Sovereignty) waddanka, kala qaybsanaan deegaamadeed iyo kala furfur siyaasadeed. La falgalka dibbada ee Dowladda Dhexe iyo Dowlad kasta oo xubin ka ah Federalka ay iskeed xiriir ula samaysay awoodo shisheeye ma keenin kala qoqob iyo kala qaybsanaan keliya ee waxa uu wiiqay dowladnimahda, mashruuca federaalka iyo dib-u-dhiska qaran, wuxuuna si toos ah ula loollamayaa madax-banaanida iyo siyaadada (Sovereignty) Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS).

Maqaalkani wuxuu si kooban u soo bandhigayaa dood ku saabsan in kaalmada dibadda, faragelinta shisheeye ee siyaasadda gudaha iyo dibbadda iyo maalgashiga qalaad (Foreign Influence, Aid and Investment), khatar muuqata ku yihiin midnimada Dowladnimada Soomaaliyeed iyo dib u dhiska qaranimadeeda. Dhinac kale marka laga eego, waxa aan la inkiri karin in taakulada iyo maalgashiga shisheeye ay lagama maarmaan u yihiin duruufaha maanta jira oo ay keentay isku fillaansho la'aanta Dowladda Soomaliya. Waxa keliya oo khatartaas looga gudbi karaa in lagu maareeyo siyaasad arrimo-dibadeed iyo midda gudaha oo midaysan (Unified Domestic & Foreing Policies), oo u adeegaya danta qaranka iyo maslaxadda guud ee bulshada Soomaaliyeed, kana fogaanaysa isdiidooyinta danaha qofeed iyo sad-bursi ee ku dhisan beel, deegaan ama gobol.

# 2. ISDIIDOOYINKA DANAHA IYO FARAGELINTA SHISHEEYAHA

Tartanka loogu hardamayo in saameyn iyo faragelin toos ah lagu yeesho Soomaaliya waxaa ku lug leh ama ku loolamaya jilayaal kala duwan oo mid walba uu wato ajandayaal iyo ujeeddooyin siyaasad-dhaqaale (economo-political), mid fikradeed (Ideological), iyo mid amni (security) u gaar ah. Ajandayaashaan kala duwan ama isdiidan waxay ka dhigayaan xiriirka u dhexeeya Dowladda Federalka Soomaliya (DFS) iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXF) goob ay ku dagaallamaan danaha isdiidan ee jilayaasha dibadda (Foreign Actors).

Muddadii u dambaysay Soomaliya waxay noqotay goob loo soo dhoofiyo (Battlefield for Proxy Competition) loollanka u dhexeeya dalalka Isbahaysiga Khaliijka (GCC), gaar ahaan xulafada ay hoggaaminayaan Sacuudi Carabiya/Imaaraadka iyo xulafada ay hor kacayaan Qatar/Turkey. Waxaan sidoo kale laga indha saaban karin danaha gurracan ee dalka Itoobiya oo geed dheer iyo mid gaabanba u fuushay sidii ay u heli lahayd marin badda ah.

Hawlgalka Ku-Meelgaarka ah ee Midowga Africa (ATMIS) iyo kii ka horeeyay ee AMISOM waxay u yihiin DFS xarig badbaado marka ay noqoto sugidda amniga iyo la dagaalanka nabad-diidka. Hase yeeshee, jiitanka iyo muddada dheer ee mashruucaani qaatay iyo in lagu wareejiyo hawlgallada amniga ciidan xoogga dalka waxay muujinaysaa walaac wayn iyo in la iswaydiiyo anjandaha dhabta ay ee halwgalkan.

Danaha Reer Galbeedka oo ay hoggaaminayaan

Maraykanka (USA) iyo Midowga Yurub (EU) waxay u muuqdaan kuwa iyagu diiradda saaraya arimaha argagaxisada oo keliya. Inkasta oo Dowladaha Yurub qaar ka mid ah ay dhaqaale iyo taakulo ka gaystaan dowlad-dhiska iyo soo celinta hanaanka dowladnimo, haddana muddada dheer ee uu qaatay hanaankani waxay fursad siisay in ay ka faa'iidaystaan awoodo gobolka ah oo soo farageliya habsocodka siyaasadda iyo dowlad-dhiska Soomaaliya.

## IMAARAADKA CARABTA (UAE)

Istaraatiijiyadda Imaaraadka waxay u muuqataa in ay ku yoto'sanayso xakamaynta kaabayaasha dekedaha istaraatiijiga ah (Strategic Port Infrastructures) iyo maaraynta saadka badda (Maritime Logistics). Faragelintooda UAE ee Soomaaliya waxay ku suntantahay heshiisyo toos ah oo ay la gasho DXF-yada iyo gobollada gooni-goosadka, gaar ahaan horumarinta iyo maamulka Dekedda Berbera ee Somaliland iyo gacan ku haynta Dekedda Boosaaso ee Puntland. Waxay sidoo kale ku leedahay saldhigyo qarsoon Garoonka Boosaaso iyo Berbera.

Siyaasadda UAE kula dhaqanto Soomaaliya waa in ay baal marto dowladda dhexe si toos ahna u xoojiso DXF-yada ama Somaliland iyadoo wiiqaysa awoodda Muqdisho ee siyaasadda dibadda. Hab-dhaqankan wuxuu siinayaa Imaaraadka in hesho ilo ganacsi iyo saldhigyo ciidan ka madax banaan dowladda dhexe iyaduna toos u maamusho. Tuhunka asaasiga ah waa in UAE ay taageerayso jilayaal siyaasadeed oo u janjeera qaab-dhismeed nidaam federaal jilicasan oo aan isku xirnayn ama ka madax banaan Dowladda Dhexe si ay ugu sahlanaato awoodeeda faragelineed.

## QATAR & TURKIGA

Labadaan waddan waxay si toos ah xulafa ula yihiin DFS ee Muqdisho, iyaga oo awoodooda faragelineed isugu geeyey inay xoojiyaan dowladda dhexe, wiiqaana DXF-yada. Faragelinta Turkiga ayaa ah kan ugu baaxadda wayn faragelinaha dibbadda ee Soomaaliya. Waxa ay yagleeleen xarunta tababarka milateri ee ugu weyn ee dowlad shisheeye samayso (TURKSOM), waxay maalgeliyeen kaabayaasha (maamulka Dekedda iyo Garoonka Diyaaradaha Muqdisho), iyo barnaamijyo kale oo ballaaran oo bani'aadamnimo iyo waxbarasho ah. Garab istaagga Turkiga waxay ku abuurtay DFS kalsooni la isku halayn karo, iyo garab siyaasadeed oo miisaankiisa leh.

Faragelinta Dowladda Qatar waxay inta badan ku kooban tahay mid dhaqaale iyo mid siyaasadeed. Qatar waxay ka aragtaa danaheeda in ay si gaar ah u taageerto ama u soo saarto shakhsiyaad muhiim u ah ajandaheeda faragelineed iyo mashaariicda horumarinta ee waaweyn ee ay fuliso si loo adkeeyo sharciyadda dowladda dhexe iyo sidii ay u soo saari lahayd hoggaan ay isla jaanqaadi karaan ama danaheeda ka furshan karto. Taageerada cad ee ay siiso DFS waxay keentaa in inta badan ay si toos ah isugu dhacaan DXF-yada ay taageeraan ama gacansaarka la leh xulafadooda kale ee Khaliijka (KSA/UAE).

## ITOOBIYA IYO DAMACEEDA MARIN BADEED

Itoobiya waa dalka ugu weyn adduunka tiro dadka (~120 milyan) ee ah dhul ka oodan marin badeed. In ka badan 90% ganacsiga uga yimaada badda wuxuu soo maraa Jibuuti oo ay kaga baxdo dhaqaale baaxad wayn soo gudbinta iyo rarida badeecadda. Ku tiirsanaanta mal marin iyo hal dowlad ee badeecada uga imaanaya dibbada, taas oo ka dhigaysa mid u nugul deganaanshaha dhaqaale iyo kan siyaasadeed ee waddankaas. Ra'iisal Wasaaraha Itoobiya, Abiy Axmed, wuxuu u arkaa helitaanka marin badeed ee madax banaan mid ku dabran jiritaankooda qaran (Existential matter).

Danaha Itoobiya ee Soomaaliya waxaa saldhig u ah colaadda taariikheed ee soo jireenka ah, gumaysiga ay haysato dhul Soomaaliyeed iyo damaceeda xad dhaafka ah ee badda Soomaaliya. Hase yeeshee, sanadihii u dambeeyay, ajandahaan amniga iyo faragelinta xuduudaha ayaa ku milmay ujeeddada dhaqaale ee ah in la helo marin badeed.

Tallaabo kasta oo ay Addis Ababa ku doonayso in ay kula gelayso heshiisyo aan sharci ahayn gobol ama deegaan ka mid ah Soomaaliya si ay u hesho deked ama saldhig ciidan waa xadgudub qoto dheer oo ka dhan ah midnimada dhuleed iyo tan qaran ee Soomaaliya, khatarna ku ah isku xirnaanta gobolka. Tusaale dhow waxaa u ah heshiiskii isfahanka (MoU) ee ay la gashay gobolka iskiis gooni-isugu taagay ee Somaliland sannadkii hore ee 2024 horaankiisi. Heshiiskaas oo dhaliyey xiisad diblumaasiyadeed oo xoog badan oo u dhaxaysa

Soomaliya iyo Itoobiya. Damacaas sharci darada ah wuxuu kale oo uu abuuray kala shakiyo heer sare ah oo wax u dhimaya xasilloonida siyaasadeed iyo tan amni ee gobolka geeska Afrika.

## MAREYKANKA (USA) IYO YURUB (EU)

Maraykanka iyo Wadamada Yurub faragelintooda arrimaha Soomaaliya waxay si gaar ah diiradda ugu haysaa ama ku foogan tahay la-dagaalanka argagixisada (bartilmaameedka Al-Shabaab iyo Daacish-Soomaaliya), burcad-badeedka iyo shuruudaha kaalmada ee loogu talagalay in lagu horumarinayo dowlad-dhiska (Nation Re-Building), maamul wanaagga (Good Governance) iyo isla-xisaabtanka maaliyadeed (Financial Accountability).

Inkasta oo ay Reer Galbeedka bixiyaan kabitaan miisaaniyadeed oo muhiim ah iyo tababarka laamaha amniga, diiradda Reer Galbeedka ee "xoojinta hirgelinta nidaam-dowladeedka (Rule of Law)" iyo daahfurnaanta (Transparency) ayaa inta badan ku socota si gaabis ah oo aan la jaanqaadi karin baahiyaha siyaasadeed ee DFS iyo dib u dhiska qaran. Dib u dhacaan wuxuu fursad siinayaa faragelinta awoodaha iyagu aan rabin in Soomaaliya markale cagaheeda ku istaagto.

## 3. SAAMAYNTA FARAGELINTA SHISHEEYE KU LEEDAHAY SIYAASADDA GUDAHA

Hardanka iyo isjiidjiidadka faragelinta shisheeye waxay saameyn taban ku yeelatay nidaamka siyaasadda gudaha ee Soomaaliya iyada oo la beegsanayo halka ay u jilicsan tahay oo ay saldhig u tahay khilaafka iyo kala qaybsanaanta xoogan ee dhexyaal siyaasiyiinta iyo golayaasha siyaasadeed ee gudaha, gaar ahaan DFS iyo DXF.

Xarig-Jiidka Siyaasadda ee DFS iyo DXF-yada

Faragelinta siyaasadeed ee shisheeyaha iyo dheesha juqraafi-siyaasadeedku waxa ay had iyo jeer dab ku sii shidaysa kala aragti duwanaanta ay saldhigga u tahay nidaamka Federal-ka ee ay Soomaaliya qaadatay si dib loogu soo yagleelo qarankii dumay ama xal loogu helo kala irdhowga siyaasadeed. Khilaafaadka u dhexeeya DFS iyo DXF-yada xoogiisu wuxuu ku saabsan yahay awood-qaybsiga (Power Sharing) iyo kheyraad-wadaagga (Resource Sharing) oo aan ka marnayn saamaynta dadban ee ay jilayaasha shisheeye ee kala duwan ku leeyihiin darafyada is-haya iyo kala aragti duwaanshahooda.

Biyo dhigga faragelinta shisheeye ee arrimaha gudaha iyo siyaasadda dalka guud ahaan waxaa tusaale nool u noqon kara in DXF ay hesho maalgelin toos ah (Direct Funding), tababar amni (Security Training), ama taageero siyaasadeed oo ka timaada kafiil dibadeed (e.g. heshiis dekedeed oo ka madax-bannaan DFS). Tallaabadaani waxay kalsooni siyaasadeed iyo mid dhaqaale siinaysaa DXF si ay u diiddo ama ula loolanto awoodda dowladda dhexe ee DFS.

Taageerada tooska ah ee shisheeye ee DXF ay helaan waxay abuuraysaa jawi tartan oo aan waxba la isula harin, sagxaddana la isla tago (Zero-Sum Game). Tartankan wuxuu ka dhigaya ku tiirsanaanta faragelinta shisheeye awood-ku-taagsi loogu gorgortamo siyaasadda gudaha iyo loolanka siyaasadeed ee u dhexeeya DFS iyo DXF. Jilayaasha dibadda (Foreign Actors), si toos ah iyo mid dadbanba, waxay u muuqdaan in ay yihiin kuwo iyagu dhisa, kobciya ama gardaadsada siyaasiyiinta (Proxy Politicians) ay u diyaarsadeen in ay xukunka qabtaan labada heer ee DFS iyo DXF, isla markaasna garab siiya dhaqdhaqaaqyada madax-bannaani raadiska ama gooni-isu-taagga ee deegaanada Soomaaliya qaarkood.

Tartanka awoodaha shisheeye ee heshiisyada ganacsiga (dekedaha, shatiyada baaritaanada shidaalka/gaaska) waxay sii huriyaan kala qaybsanaanta siyaasadeed ee gudaha iyaga oo ku shuba dakhli aad u badan oo aan cashuur lahayn jeebabka siyaasiyiinta, oo aan marin khasnadaha rasmiga ee DFS ama DXF iyo nidaamka hanti-dhowrka qaran. Ku tagrifalka awoodeed waxay shidaal u noqotay isku dhaca gudaha ee ku saabsan qaybinta kheyraadka iyo dakhliga, taas oo sii wiiqaysa dhismaha nidaam federaal maaliyadeed oo midaysan oo la isku waafaqsan yahay (Equitable Fiscal Federalism Model).

Dib U Soo Noolaynta Hay'adaha Amniga ee Qaran (Security Sector Reform)

Dadka u dhuun daloola arrimaha amniga iyo dib u dhiska Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (CXDS) oo midaysan, xirfad leh, agabkooduna u dhan yahay waxay farta ku fiiqayaan in sababka ugu wayn ee curyaaminaya ama caqabada aan laga gudbi karin ku ah ay tahay kala-qaybsanaanta gargaarka iyo

taageerada amniga iyo tababarada ciidan ee ay awoodaha shisheeye kala siiyaan DFS iyo DXF-yada oo aan isla jaanqaadayn isla markaasna aan lahayn ajanda midaysan.

Dowladdo shisheeye oo kala duwan ayaa wada barnaamijyo tababar oo is barbar socda. Tusaale: Ciidammada Gorgor ee Turkigu tababaray, Ciidammada gaarka ah ee Danab ee Maraykanku tababaray, iyo ciidamo kale oo ay tababaraan Midowga Yurub iyo Imaaraadka. Ciidammadaas kala duwan oo ay kala taageeraan awoodaha shisheeye ee kala duwan waxay inta badan ka amar qaataan jihooyin kala duwan, waxayna raacaan xeerar kala duwan, kamana hufna saamaynta deegaaneed ama reereed ee ragaadisay dib u dhiska qaran.

Natiijadu waa ciidamo kala duwan oo daacad u ah jaalayashooda shisheeye ee gaarka ah ama taliyayaashooda halkii ay ka lahaan lahaayeen qaab-dhismeed talis qaran oo midaysan (Unified National Command). Kala qoqobka ciidan iyo ajandayaasha kala duwan ee taageeyasha shisheeyaha waxay ka hor istaagaysa DFS inay yeelato ciidan qaran oo dhab ah, ka maran qabiil iyo ajanyaal siyaasadeed awoodna u yeesha in ay mas'uuliyadda amni ee qaran kala wareegaan ciidamada shisheeye ee ATMIS.

Ku-tiirsanaanta ciidammada shisheeye (ATMIS) iyo ciidammada isbarbar socda ee ay shisheeyuhu maalgelinayaan waxay dhaawac wayn u geysatay siyaadada (Sovereignty) iyo gacan ku haynta talada waddanka. DFS waxaa aad ugu adag inay muujiso awoodeeda gacan ku haynta talada waddanka iyo siyaadadiisa (Sovereignty) inta jiritaankeedu ku xiran yahay joogidda iyo ilaalada amni ee awoodaha shisheeye sida ATMIS. Intaa waxaa dheer, qulqulka ballaaran ee kaalmada caalamiga ah, oo inta badan ka leexata nidaamyada dowladda.

Kaalmada shisheeye waxay abuurtay dhaqan ah ku-tiirsanaanta kaalmada (Aid Dependency), waxay shidaal u noqontay musuqmaasuqa, iyada oo had iyo jeer ay madaxda DFS iyo DXF-yada mudnaanta siinayaan sidii ay u heli lahaayeen taageerada, kaalmada iyo maalgelinta shisheeye halkii ay ka abuuri lahaayeen ilo-dakhliyo gudaha ah iyo nidaamyo maaliyadeed oo la iskala xisaabtami karo, loogana maarmi karo kaalmada iyo faragelinta dibadda.

# 4. SOO BANDHIGIDDA ARAGTI HUFAN EE SIYAASADDA DIBADDA

Faalada kore waxay daaha ka qaadaysaa in horumarka iyo dib u soo kabashada qaranimada iyo kasbashada siyaadada (Sovereignty) Soomaaliya aysan ku tiirsanayn kuna soo noqonayn in laga maarmo ama la diido taakulada dibadda oo keliya laakiin ay u baahantahay in loo maareeyo si hufan, xikmadaysan oo danta qaran iyo tan ummadeed ka hormarinaysa danaha shakhsi, beeleed ama deegaan. Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) waxaa la gudboon inay ka gudubto u xaglo xaydashada kaalmooyinka dibadda iyo u tartamida garab istaagga siyaasadeed ee shisheeyaha una guurtaa maareeyn firfircoon oo istiraatiiji ah oo si hufanna loogu maamulayo xiriirkeeda caalamiga ah oo u adeegaya madax banaanida siyaasadeeda iyo danteeda qaran. Si tallaabadani u hirgasho waxaa lama huraan ah in si degdeg ah loo dejiyo loona dhaqan-geliyo Aragti Qaran ee Siyaasadda Arrimaha Dibadda (National Foreign Policy Doctrine) oo ku dhisan, saldhigna ay u tahay aragtiyo cad, midnimo, iyo mabaa'id qaran oo gundhig u ah maaraynta dhammaan iskaashiyada dibadda, laguna xakameeyo faragelinta shisheeye ee taban ama gurracan.

## MUDNAANSIINTA SIYAADADA IYO DANTA GUUD EE QARANKA

Tiirka aasaasiga ah ee qorshaha "aragti hufan" ee lagu dejinayo siyaaasad arrimo dibadeed laguna maaraynayo la falgalka awoodaha shisheeye waa inuu noqdaa mabda'a "Mudnaanta Soomaalinimada (Somali First)". Mabda'ani wuxuu u arkaa in kaalmada dibadda ay tahay awr-ku-kacsi iyo ku meelgaar inta laga helayo isku-filnaansho qaran, lagana abuurayo ilo-dakhli gudeed looga maarmayo faragelinta shisheeye ee danaysan.

Si ay u hirgasho siyaasad arrimo-dibadeed oo hufan, waxa la gudboon DFS inay si cad u qeexdo una dhaqan-geliso xuduudaha aan laga tallaabsan karin, gorgortanna laga geli karin (Non-negatiable Red Lines) ee lagula dhaqmayo dhammaan jilayaasha shisheeye (Foreign Actors). Xuduudaha lagama gudbaanka ah waxaa ka mid ah:

1. Midnimada Dhuleed (Territorial Integrity): Waa in meesha laga saaro heshiis kasta oo lala gelayo

jiho shisheeye ah (mid ganacsi ama milateri) oo ay gelayaan DXF-yada ama hay'ad heer gobol iyada oo aan oggolaansho cad oo rasmi ah laga helin DFS. Ku xad-gudubka xuduudan waa in ay ka dhalataa in xiriirka loo jaro ama la kulanto ciqaabka ay mudan tahay jihada shisheeye ee ku tallaabsata ku xad-gudubka xuduudan cas.

2. Midaynta Hawlgaladda Ami (Integrated Security Programs): Dhammaan barnaamijyada tababarka iyo taakulada amni ee ay bixiyaan dowlado ama hay'ado shisheeye waa in lagu mideeyaa hal dallad iyo xeerar-nidaamiye hoos jooga DFS si loo hubiyo in askari kasta uu daacad u yahay qaranimada iyo midnimada Soomaaliyeed ee uusan daacad u ahayn qabiil, deegaan, ama shisheeyaha isagu taakulada bixinaya.

Aragtida "hufnaanta siyaasadda dibadda" waxay tibaaxaysaa in dhammaan maalgelinta iyo taakulada dhaqaale ee deeq-bixiyayaasha iyo gargaarada horumarinta ay si aan leex-leexasho lahayn ula jaanqaado Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) ee dalka. DFS waa inay si xooggan u hirgelisaa Qorshaha Wadajirka iyo Midnimada Qaran ee DFS iyo DXF-ya (Integrated Systems Raodmap for Federal Government & Federal Member States), si loo soo afjaro isbar-baryaaca iyo taakula ku dhisan mashaariicda gooni-goonida ah (Project Based Interventions) looguna gudbo nidaam maaliyadeed oo midaysan (Unified Fiscal System), isku xiran, kuna dhisan wadashaqayn iyo isfahan u dhexeeya DFS iyo DXF-yada. Qorshahaani wuxuu hoosta ka xariiqaya lahaansho ummadeed iyo dhisidda kartida hay'adaha qaran ee heer DFS iyo DXF.

Mideynta Siyaasadda Arrimaha Dibadda ee Dalka

Si ay meesha uga baxdo is qabqabsiga foosha xun ee DFS iyo DXF-ya, waa in meesha laga saaro mugdi-gelinta qodobada dastuurka ee ku saabsan awood-qaybsiga siyaasadda arrimaha dibadda (Qodobada 53 iyo 54 ee Dastuurka Ku-Meel-Gaarka ah) si aysan u noqon surin ama mus ay kasoo dusaan shisheeyaha iyo faragelintooda. Waa in dib loo xoojiyo madasha wadatashiga (National Consultative Council) ee DFS iyo DXF-yada loona rasmiyeeyo si waafaqsan Dastuurka iyada oo looga tashanayo arrimaha waawayn ee masiiriga ah, awood-qaybsiga, khayraadka dabiiciga ah iyo heshiishyada caalamiga ah.

Awoodaha dastuuriga ah ee madashan ama golahaan wadatashi ee qaran waxaa saldhig u noqonaya:

1. Ansixinta Heshiisyada Waaweyn (Approving Major Deals): Waa in cod aqlabiyad ah oo ay dhammaan darafyada DFS iyo DXF u dhan yihiin lagu ansixiyo heshiisyada waaweyn ee dekedaha, qandaraasyada shidaalka/gaaska, iyo heshiisyada saldhigyada milateri. DXF-yada in ay qayb ka noqdaan heshiisyadaan si la isla ogol yahay daciifin mayso awoodda DFS ee waxa ay xoojinaysaa midnimada iyo in loo wada shaqeeyo si kalsooni iyo niyadsami leh.

2. Qeexidda Federaalnimada Nidaamka Maaliyadeed (Fiscal Federalism): Waa in la dardar-geliyo wadahadallada u dhexeeya DFS iyo DXF-ya ee heshiiska mudada dheer la sugayay kuna saabsan Nidaamka Federaalnima Maaliyadeed (Fiscal Federalism), iyada oo si cad loo qeexayo hababka lagu wadaagayo dakhliga canshuuraha ganacsiga gudaha iyo kan caalamiga ah, canshuuraha dekedaha, iyo soo-saarista kheyraadka dabiiciga ah. Heshiiskaan wuxuu meesha ka saarayaa isfahan daradda, kalsooni xumada iyo isbarbaryaaca darafyada DFS iyo DXF-yada. Waxa uu heshiiskani horumarinayaa ganacsiga oo hadda uu culays badani ka haysto in DFS iyo DXF-yadu mid kasta goonidooda uga qaadaan shatiyo iyo canshuuro is barbar yaac ah oo aan loogu turayn shacabka.

Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee DFS waxaa looga fadhiyaa in ay soo saarto hab-dhismeed cad, oo loogu qeexayo laguna sargoynayo (Standardised Templates) dhammaan Heshiisyada Isfahamka (MoUs), iyo heshiisyada laba-geesoodka ah (Bilateral Agreements), iyada oo la hubinayo in ay waafaqsanyihiin midnimada qaran, u hoggaansanaanta sharciyada dalka oo ay ka mid tahay go'aanada madasha wadatashiga qaran u gaaraan si wadajir iyo is ogol ah.

## ADEEGSIGA AWOODDA DABACSAN (SOFT POWER)

Si loo yareeyo saameynta hal jilaa oo shisheeye (Single Foreign Actor) oo gacanta ku dhiga arrimaha siyaadada (Sovereignty) iyo madax-banaanida talada (National Sovereignty) ee dalka, DFS waa in ay yeelato saaxiibo dibadeed kala duwan iyadoo adeegsanaysa awoodaheeda dabacsan. DFS iyada

oo ilaashanaysa danaheeda qaran ee ay ka leedahay Waddamada Khaliijka, Turkiya iyo Reer Galbeedka, haddana waa in aysan ku ekaan ee ay eegtaa jihooyinka kale sida Shiinaha, Hindiya iyo Koonfurta Kuuriya, tusaale ahaan. Xiriirada dibada waa in ay ku koobnaadaan ama xoogga saaraan kaabayaasha dhaqaalaha, iskaashiga ganacsiga, khibrad wadaaga iyo tiknooloojiyada.

DFS waxa kale oo la gudboon in ay qaadato nidaamka siyaasadda darafyada badan (Multilateralism) si ay u fududayso saamaynta xad dhaafka ah iyo cadaadiska aan la xamili karin ee uu keenay nidaamka laba-geesoodka (Bilateralism) ee ay heshiisyada la gelayso hal dowlad oo keliya. Waa in DFS ay si firfircoon u hawlgeliso xubinimadeeda hay'adaha gobolka sida Urur Goboleedka IGAD, Midowga Afrika (AU), iyo hay'adaha caalamiga ah sida Qaramada Midoobay iyo Ururka Iskaashiga Islaamka (OIC). Xubinnimadaan waxay u adeegsan kartaa in ay ku taagsato kuna yareyso saameynta iyo cadaadiska heshiisyada laba-geesoodka ah ee xooggan. Adeegsiga iyo ku-taagsashada nidaamka darafyada badan wuxuu siinayaa DFS awood ay ku baraxdo cadaadiska heshiisyada laba-geesoodka.

Awoodaha dabacsan ee DFS adeegsan karto, kagana maarmi karto taakulo shisheeye, waxaa ka mid ah cududda qurbajoogta ku nool wadamada Reer Galbeedka oo dhan ~ 2 milyan qof. Qurbajoogta waxay dalkana soo geliyaan in ka badan $1.5 bilyan sanadkii, xawaalad ahaan. Muddadaan dambe in badan oo ka mid ah qurbajoogta waxay saamayn muuqata oo leh heerar kala duwan ku yeesheen waddamada ay ku suganyihiin. Haddii loo hawlgeliyo si ku habboon, qurbajoogta waxay si buuxda u mateli karaan danaha iyo ajandayaasha qaran aan ka leenahay dibadda iyo wadamada ay kala joogaan. Waxaa in la xuso mudan in iyaga la taagsan karo Soomaalida ku nool wadamada deriska, sida Kenya oo ay Soomaalida ku nool ku leeyihiin awood siyaasadeed iyo mid dhaqaale oo muuqda iyo weliba Dowlad Deegaanka Itoobiya (DDS). Gurbajoogta ku nool dowlaha horumaray waxaa looga faa'iidaysan karaa dhowr arrimood oo ay ka mid tahay:

1. Wareejinta Aqoonta (Knowledge Transfer): Ballaarinta barnaamijka IOM ee Socdaalka iyo Horumarinta Afrika (MIDA) si xirfadlayaasha qurbajoogta ah loogu meeleeyo si istiraatiiji ah hay'adaha dowladda ee muhiimka ah (Maareynta Maaliyadda Dadweynaha, Garsoorka, iyo Tamarta) si loo dardar geliyo helitaanka aqoon iyo xirfado sare oo la jaanqaadi kara adduunka intiisa kale.
2. Maalgelin Hufan (Ethical Investment): Abuurista Sanduuq Maalgashi (Diaspora Investment Fund) ee qurbajoogta oo leh shuruudo gaar ah iyo canshuur dhaaf, laguna maalgelinayo kaabayaasha waawayn ee dhaqaalaha, tamarta cusboonaata, iyo horumarinta ganacsiyada beeraha, kalluunka iyo xoolaha (Agro-Fisheries).

## 5. GABAGABO IYO HOGATUSAALAYN

Soomaaliya waxay dhacdaa juqraafi ahaan marin iyo dhuun istaraatiji ah lagama maarmaana u ah dheesha juqraafi-siyaasadeedka adduunka. Dheeshaani waa seef labo af leh oo wadata khatarteeda iyo faragelinteeda shisheeye ee siyaadadda (Sovereignty) iyo khayraadka dabiiciga ah (Natural Resources) ee dalka, dhanka kalena wadata fursadaheeda looga faa'iidaysan karo dowlad-dhiska, kabitaanka miisaaniyadaha iyo taageero amni iyo tababareed oo ciidan. Waxa aan shaki ku jirin in inta ay madaxda siyaasada DFS iyo DXF-ya ay u oggolaanayaan ama u nugul yihiin faragelinta jilayaasha shisheeye (Foreign Actors) ee arrimaha siyaasadda gudaha iyo dibadda, kala qaybinta dalka, iyo kala xigsashada deegaanada ku dhisan dano shakhsiyadeed, beeleed, gobol iyo deegaan gaar ah, ilaa inta talo-xumadaasi jirto waxaan shaki ku jirin in ay aad u fogtahay ama adagtahay in la gaaro riyada dib u dhiska dowlad Soomaaliyeed oo xooggan, midaysan, waxna la qaybsan karta adduunka intiisa kale.

In la gaaro horumar la taaban karo iyo isbedel dhab ah waxay u baahantahay wacyi iyo isbedel fikradeed, aqooneed iyo waddaniyadeed. Waxaynu u baahanahay in la qaado waddo hor leh oo dib loogu qorayo shuruudaha dheesha lagula falgelayo faragelinta shisheeye iyo ka danaysigooda kala qaybsanaanta DFS iyo DXF-ya ... isbeddel dhab ah oo lagu xaqiijinayo geesinimo siyaasadeed, midnimo qaran, dib u hanasho siyaadada (Sovereignty) dalka iyo wadajir ummadeed.

Danta guud ee qaranka oo far waawayn lagu qoro lagana horumariyo danaha kale oo dhan, iskaashi dhab ah iyo wadashaqayn DFS iyo DXF-yada wuxuu suurtagelinayaa in ay mowqica istaaraatiijiga ah ee Soomaaliya u rogto mid u adeega danaheeda qaran, kana dhiga laacib aan la loodin karin markay timaado dheesha juqraafi-siyaasadeedka.

**W/Q:** Dr. Maxamuud C/Raxmaan Maxamuud

# QAYBTII 2-AAD:

## 27 SANO KADIB: PUNTLAND MA U BAAHAN TAHAY DIB-U-HABAYN SIYAASADEED, DHAQAALE, AMNI IYO ARRIMAHA BULSHADA?



Axmed Siciid Nuur



Xigashada Sawirka: Facebook

## HORDHAC

Cadadkii hore ee soo baxay bishii October, waxaan kaga hadalnay arrinta cinwaanka kore ku xusan, oo ahayd baahida loo qabo in mar walba dib-u-qaabayn lagu sameeyo nidaamka dowladnimada Puntland dhinac kasta. Waxaan kusoo bandhignay dib-u-habeynta nidaamka dowladeed ee loo baahanyahay, anagoo tixraacnay fikradaha iyo talooyinka khuburada arrimahaas ka faallooda, kuwa Islaamka iyo kuwa reer Galbeedka labadaba.

Cadadkii hore, waxaan xusnay baahida Puntland u qabto inay dib-u-qaabayso dastuurkeeda, maadaama dastuurku uu mar walba u baahanyahay inuu la jaanqaado duruufaha iyo xaaladaha waqtigu keenayo. Waxaan sidoo kale tooshka ku ifinay baahida loo qabo in dowlad-wanaag laga hirgeliyo Puntland, anagoo falanqaynay waxa dowlad-wanaagu yahay iyo mabaadii'da uu ku dhisan yahay, si loo fahmo saldhigga iyo jihada horumar ee dowladnimada Puntland.

Haddaba, qormadaan waxaan ku soo bandhigi doonaa dib-u-qaabaynta loo baahanyahay ee ku saabsan arrimaha dhaqaalaha, amniga, caddaaladda, iyo arrimaha bulshada, anagoo falanqeyn doona caqabadaha jira iyo tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah horumar waara ee Puntland.

## ARRIMAHA DHAQAALAHA

Guud ahaan dhaqaalaha Soomaaliya waa mid aad u hooseeya warbixintii ugu damayasay 2024 waxay ku qiyaastay guud ahaan wax-soo-saarka iyo dhaqaalaha Soomaaliya oo dhan GDP 11.97 Billion (World bank 2024), guud ahaan dalka Soomaaliya oo Puntland ay qayb ka tahay waa dal ku tiirsanaa weligiis kaalmo dibadeed, kaalmadaas oo sanadkaan aan ku jirno laga bilaabo aad hoos ugu dhacday iyadoo la filayo inay saamayn xoog leh yeelan doonto, adduunkuna hadda uu galay marxalad dagaal dhaqaale iyo dagaale kale intaba.

Dhaqaalaha Puntland guud ahaan wuxuu ku tiirsanyahay xoolaha nool oo qayb weyn ka qaata wax-soo-saarka waxaa lagu qiyaasaa guud ahaan Soomaaliya oo dhan in wax-soo-saarka xooluhu ay kaalin weyn ku leeyihiin dhaqaalaha qiyaas gaaraysa ilaa 70%.

Dhaqaalaha dowalda Puntland ay cashuur ahaan uga qaado dadka oo bishii qiyaas ahaan ah 8 milyan oo doolar ah, waa qayb ka mid ah dhaqaalaha dalka loona baahanyahay in loo diyaariyo in lagu kobciyo wax-soo-saaraka Puntland, hase yeeshee taas badelkeeda dhaqaalahaas dowalada kharashkeeda iyo sugista hawlaha amniga ma soo dhaafto.

Waxaa jira abaaro xoog leh sanadkab roobkii Deyrta waa la waayey xaaladda dhaqaale ee dadka iyo dalku ku suganyihiin waa mid aad u adag sidaas darteed dowaldda waxaa looga fadhiyaa inay la timaado qorshe dhaqaale oo mustaqbalka lagu wajihi karo duruufaaha adag oo soo wajahan.

Arrimaha ay ka midyihiin abaarta, kaalmaddii dibadeed oo hoos u dhacday, dhaqaalihii adduunka oo guud ahaan xumaaday iyo iwm waxay muujinaysaa khatar badan oo soo wajahan mustaqbalka guud ahaan dadka Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan. Tiirarakii dhaqaalaha oo dalku ku tiirsanaa sida beeraha, kalluumaysiga iyo xoolaha loogma faa'idaysan sidii la rabay, khayraadka kalluumaysiga dalkeena isaga boob dibadeed ayaa ku socda Soomaali badanina waa dulaaliin fududeeya in la boobo khayraadka badeheena.

Puntland dadkii dhaqaalaha haystay waa ay ka tageen taasoo dhibaato weyn ku keentay dhaqaalaha, dad badan oo dalka ka shaqaysta oo ay qeybtood xilal dowladeed hayaan ayaa qoysaskooda dalal kale ku biila oo mushaharkooda u xawila meelahaas taasoo macnaheedu tahay in cashuurtii dadka Puntland laga qaaday ay ka qayb qaadanayso kobcinta dhaqaalaha dalal kale halka ay dalka gudihiisa wax ka tari lahayd, taasina waa nasiib darro.

Sidoo kale, wareegii lacagta ama dhaqaalaha ayaa aad u yaraaday waxaana loo sababaynayaa dhowr arrimood; dhaqaalihii oo galay gacanta dad kooban, musuqmaasuqa oo aad u baahsan, shaqaalihii oo aan mushaharkooda joogto u qaadan ama aanba helin, taasoo keenaysa in ay dhici weydo in dadka dakhli soo galaa oo u sahlaya in ay awood u yeeshaan in ay wax iibsadaan. Mar haddii aan dadku dakhli ay wax ku iibsadaan aysan lahayn ganacsigiina ma helaayo cid wax ka iibsata, dowladda ruuxeedu ma helayso canshuur ay dadka ka qaado mar hadii dadkii aysan waxba gacanta ku hayn. Sidaas darteed bay dowaldda waajib ugu tahay inay ka

fekerto shaqo abuurka dadkeeda, dakhligooda si iyaduna ay cashuur uga hesho.

Fursadaha iyo caqabadaha dhaqaale ee ka jira Puntland

Khayraadka badda, faleenka, iyo xoolaha nool waa ilaha dhaqaale ee Puntland ay si weyn ugu tiirsanaan karto, waana fursado dabiici ah oo Ilaahay ku mannaystay. Si kastaba ha ahaatee, si looga faa'iideysto khayraadkan waxaa loo baahanyahay farsamo, aqoon iyo hab-raac wax-soo-saar oo casri ah. Dal kasta oo doonaya inuu ka faa'iidaysto khayraadkiisa wuxuu u baahanyahay siyaasad xasiloon oo dhiirrigelisa horumar, hay'ado dowladeed oo nidaamsan, iyo maalgelin gudaha ama dibadda ah oo kor u qaadda wax-soo-saarka. Sidoo kale, kobcinta aqoonta iyo farsamada wax-soo-saarka ayaa door muhiim ah ka qaadata horumarinta dhaqaalaha, halka shaqo-abuurka iyo kordhinta dakhliga bulshada ay sare u qaadaan awoodda wax iibsiga iyo dhaqaalaha guud. Hagaajinta caafimaadka bulshada ayaa iyaduna muhiim ah, maadaama bulsho caafimaad qabta ay awood u leedahay wax-soo-saar iyo horumar waara.

Khayraadka badda weli sidii la rabay ugama faa'iidaysanno, inkastoo aan leenahay xeeb aad u dheer oo hodan ku ah noocyo badan oo khayraad ah. Sidoo kale, faleenka—oo ay ku jiraan maydiga, beeyada iyo xabkaha—waa ilo dhaqaale oo muhiim ah oo Puntland si weyn caan ugu tahay, balse aynu dayacnay. Si loo gaaro horumar waara, waxaa lagama maarmaan ah in khayraadkan dabiiciga ah loo helo maalgashi, farsamo iyo qorshe istaraatiiji ah oo u suurtageliya bulshada iyo dowladda inay ka helaan faa'iido dhaqaale oo dhab ah

Caqabadaha dhaqaalaha inaga haysta waa kuwo badan, waxaana ka mid ah xasilooni-darrada siyaasadeed, awoodda waxqabad ee hooseysa ee hay'adaha dowlada, iyo siyaasad dhaqaale oo aan jirin ama aan si dhab ah loo dhaqan gelin. Musuqu wuxuu noqday caqabad weyn oo wiiqaysa koboca dhaqaalaha, halka ilaha dhaqaalaha ee aynu leenahay ay yihiin kuwo aan si habaysan loo maareyn. Sidoo kale, suuq la'aanta ayaa saameyn xooggan ku leh wax-soo-saarkeenna, maadaama waxa yaryar ee aynu soo saarno aanu lahayn suuqyo diyaar u ah in lagu iibiyo ama oggolaanaya in la geeyo. Dhammaan caqabadahan iyo kuwo kale oo badan waxay si toos ah u curyaamiyaan dhaqaalaha Puntland, waxaana lagama maarmaan ah in loo helo xal waara oo mustaqbalka horseeda horumar iyo xasillooni dhaqaale.

## AMNIGA

In kasta oo falal dambiyeedyo ka dhacaan, Puntland waxay weli ka mid tahay meelaha ugu ammaanka wanaagsan Soomaaliya. Khataraha amni ee la xiriira argagixisada, sida dagaalada ka socda Calmiskaad iyo buuraha Galgala, waxay muujinayaan in Puntland ay mararka qaar bartilmaameed u tahay kooxaha argagixisada. Amniga gudaha iyo kan dibadaba labadaba wuxuu u baahanyahay siyaasad amni oo cad, maalgashi dhaqaale, iyo iskaashi bulsho oo lagu xakameeyo khataraha amni ee iman kara. Sidoo kale, isticmaalka maandooriyaha iyo isku-qabsashada dhulka iyo deegaamada miyiga ah ayaa ka mid ah meelaha ay khataraha amni ka jiraan, kuwaas oo u baahan in si wadajir ah loo maareeyo.

Ciidamada ammaanka Puntland waa geesiyaal ku fiican dagaalka furimaha, hase yeeshee sugidda amniga magaalooyinka, sida la-dagaalanka maandooriyayaasha iyo dambiyada culus ee ka dhaca gudaha Puntland, waxay u baahanyihiin ciidamo si gaar ah loogu tababaray hawlahaas khaaska ah. Ciidamadan waxaa laga doonayaa inay bulshada la falgalaan isla markaana wax ka qabtaan dhibaatooyinka amni ee magaalooyinka waaweyn ka dhaca. Dib-u-eegis ballaaran ayaa amniga Puntland u baahanyahay, ha ahaato xakameynta socdaalka iyo soo gelitaanka ama wax ka qabashada dambiyada culus ee bulshada dhexdeeda ka dhaca, kuwaas oo u baahan ciidamo leh aqoon, farsamo iyo xirfad gaar ah. Guud ahaan, amnigu wuxuu u baahanyahay siyaasad cad, aqoon sare, iyo maalgelin joogto ah si wax looga qabto dhibaatooyinka amni-xumada ah.

## ARRIMAHA GARSOORKA

Garsoorku waa mid ka mid ah tiirarka dowladnimada Puntland, iyadoo Golaha Garsoorku yahay gole madax-bannaan oo shaqadiisa u fuliya si madaxbannaan. Hase

yeeshee, kalsoonida dadka ay ku qabaan nidaamka garsoorka ayaa aad u hooseysa, waxaana inta badan dadku ka caga-jiidaan in ay arrimahooda cadaaladda u baahan u geeyaan maxkamadaha rasmiga ah. Taas bedelkeeda, waxay door bidaan in ay u aadaan culumada iyo xafiisyada gaarka ah ee u furan in ay shareecadda Islaamka ku garnaqaan.

Kalsooni xumada dadka ay ku qabaan garsoorka ayaa si buuxda u muujinaysa heerka uu garsoorka Puntland maanta ku suganyahay. Waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo dib-u-eegis siyaasadeed oo cusub, taasoo diirada saaraysa aqoonta, maalgelin, iyo dejinta nidaam iyo siyaasad cusub oo saldhig u noqota garsoorka.

## ARRIMAHA BULSHADA

Caafimaadka iyo waxbarashadu waa labada tiir ee ugu muhiimsan bulshada, labaduna waxay aad ugu tiirsanyihiin kaalmooyinka hay'adaha caalamiga ah. Waxbarashada, gaar ahaan, waxay ku tiirsantahay khidmadaha ardayda laga qaado, kuwaas oo lagu daboolo mushahaarka macalimiinta iyo baahiyaha kale ee iskuulka. Kharashkaas waxaa bixiya waalidiinta, hase yeeshee duruufaha dhaqaale ee hadda ka jira Puntland ayaa ka dhigaya mid ay adagtahay in waalidiintu awoodaan inay bixiyaan kharashaadka iskuulka. Intaa waxaa dheer, kaalmooyinkii hay'adaha ee waxbarashada sida dhismaha iskuulada, tababarada macalimiinta, iyo agabka waxbarashada ayaa mustaqbalka laga yaabaa inay yaraadaan, taasoo saameyn weyn ku yeelan karta tayada waxbarashada iyo helitaankeeda Puntland.

Sidoo kale, caafimaadka aasaasiga ah oo ku tiirsanaa kaalmooyinka dibadda ayaa wajahaya xaalad khatar ah, taasoo saameyn ku yeelan doonta boqolaal xarumaha dhallaanka iyo hooyada iyo goobo caafimaad oo kale. Mar horeba, xarumaha qaar ayaa la kulmay duruufo dhaqaale oo ay ka mid yihiin mushaharka shaqaalaha iyo daawooyin iyo agab kale oo la waayay ama yaraaday.

Weli ma muuqato qorshe dowladeed oo la soo bandhigay oo si rasmi ah looga hadlayo arrimahan, ama talo la iska weydiiyo xal u helidooda. Qorshe ku dhisan isku-tashi ayaa lagama maarmaan ah si loo daboolo firaaqa banaan ee ka dhashay duruufaha adag ee saameeyay waxbarashada iyo adeegyada caafimaadka.

## GABAGABO

Dal kastaa wuxuu leeyahay khayraad dabiici ah oo Ilaahay ku mannaystay, hase yeeshee Soomaaliya, gaar ahaan Puntland, weli kama faa'iideysan hab wax ku ool ah khayraadkaas. Arrintan waxaa saameeya xasilooni-darro amni iyo siyaasadeed, tayada hoose ee hay'adaha dowliga ah, aqoon la'aan, musuqa iyo maamul xumo joogto ah.

Amnigu waa furaha horumarka, wuxuuna u baahanyahay siyaasad cad, maalgelin, aqoon iyo hab-dhaqan si khataraha gudaha iyo dibaddaba looga hortago, iyadoo khatar kasta u baahantahay qorshe gaar ah. Garsoorka iyo cadaaladda ayaa ah tiirarka siyaasadda iyo dhaqaalaha, maadaama maalgashadayaashu ka baaqsadaan dal aan nidaam sharci oo hufan lahayn. Sidoo kale, waxbarashada iyo caafimaadka, oo ah asaaska bulshada, ayaa wajahaya khatar weyn sababtoo ah hoos u dhaca dhaqaalaha iyo kaalmada dibadda, taasoo muujinaysa baahida loo qabo qorshe wadajir ah oo dowladda iyo bulshada ay ka qayb qaataan si caqabadaha loo xalliyo loona xaqiijiyo horumar waara.

**W/Q:** Axmed Siciid Nuur

# MAXAA LOO WAAYEY HAL MADAXWEYNE OO SAXA?




**Ali Haji Warsame**
MA MBA CPA CGMA



**Xigashada Sawirka**: Facebook

Soomaaliya waa dal hodan ku ah kheyraadka dabiiciga ah iyo xoolaha, ka kooban dad isku mid ah dhinac kasta, kuna yaal meel adduunka istiraatiiji ka ah. Dalka Soomaaliya wuxuu leeyahay xeebta labaad ee ugu dheer qaaradda Afrika, taasoo hodan ku ah kheyraadka badda, iyo hanti dhinaca xoolaha ah ku dhawaad konton milyan oo neef. Intaas waxaa dheer, Soomaaliya waxay leedahay tirada ugu badan ee geela adduunka, waxaana laga helaa noocyo naadir ah oo faleenka iyo maydiga adduunka ugu qaalisan. Faleenka si gaar ah waxaa loogu isticmaalaa barafuunadda, daawooyinka, iyo munaasabadaha diimeed ee adduunka oo dhan. Sidoo kale, Soomaaliya waxay ka weyn tahay dalka Faransiiska laba jeer, dalka Rwanda-na ugu yaraan labaatan jeer.

Taliyihii Ingiriiska ahaa ee lagu magacaabi jirey Gerald Hanley wuxuu 1974 buuggiisa lagu magacaabo “Dagaalyahannada: Qaabka Nolosha iyo dhimashada Soomaalida Dhexdeeda”, ku iftiimiyay sifooyinka la yaabka leh ee dadka Soomaalida ah, isaga oo sheegay in ay yihiin dad qadarrin mudan xataa haddaan la jeclaan karin. Taliyuhu wuxuu tilmaamey in aysan qabin dareen ama cuqdad hooseyn (inferiority complex), aysana si gaar ah u qaddarin hab-dhaqanka Galbeedka iyo ilbaxninmadooda. Intaas waxaa dheer, ayuu yiri Col. Hanley in dadka Soomaalida ah uu caqligoodu iyo fahamkoodu aad uga sarreeyo Afrikada madow, wuxuuna ku soo gabagabeeyey qoraalkiisa “Soomaaligu waligiis wuxuu isu arkaa inuu caddaanka ama san-ku-neefle oo dhan uu laba jeer ka fiicanyahay, xataa markii uu khaldan yahay”. Wuxuu intaas raaciyey in “Caqligooda iyo maskaxdoodu ay si dabiici ah uga sarreyso cid walba, marka warshadaha waxbarashada loo furana ay ka yaabsan doonaan Afrika inteeda kale”.

Taliye Hanley isagoo hadalkiisii sii wata wuxuu intaa ku daray in “Dhammaan Afrika oo dhan aysan jirin dad ka wanaagsan in lagu dhex-noolaado, iyagoo ah kuwa ugu dhaadheer, ugu fikirka badan, ugu geesinimada badan, ugu dookha sarreeya, ugu naxariista badan, ugu saaxiibtinimada wanaagsan, waana dadka Soomaalida ah”.

Aabayaashii iyo asaasayaashii xornimadeena ee dhallinyarada ahaa waxay ku haminayeen inay abuuraan qaran u abaabulan ilaalinta xoriyadda iyo sharaftii dadkooda oo ay si adag ugu soo dagaallameen. Waxay ku riyoonayeen dal dimuqraadi ah oo dadaal u gala in uu nolol fiican siiyo shacabkiisa, korna u qaado wada noolaanshaha nabadeed bulshada dhexdeeda, iyo in ay kuwa weli ku jira gacanta gumeysiga ay ka dhigayaan qayb ka mid ah. Halgame Maxamed Cawaale Liibaan oo ahaa dhallinyardii SYL iyo xubin Golihii Dhexe wuxuu allifey calankeena quruxda badan ee buluuga saafiga ah oo samada la midab ah, oo ay xiddigta shanta- gees lihi dhexda uga xardhan tahay ay matalayaan qiyamka iyo mabaadi’dan

aasaasiga ah ee qofka Soomaaliga ah, oo si qoto dheer ugu xiran DNA-geena, kuna duugan dastuurkeena.

Si kastaba ha ahaatee, 65 sano kadib madax-bannaanidii dalka, Soomaaliya waxay u muuqataa inay la halgamayso madax hogaamin xun, siyaasiyiin aan anshax lahayn, hay’ado maamul oo taag daran, daciifna ah iyo musuqmaasuq baahsan oo xargihii goostey. Dhibaatooyinkan waxay noqdeen culays iyo ceeb dul saran dadkeena, gudaha dalka iyo dibaddaba. Kheyraadkeena badan ayaa noqday mid baylah ah, halka baddaheena ay isu beddeleen meel lagu duugo qashinka Yurub iyo walxaha sunta ah. Sidoo kale, kheyraadkii baddaheena ayaa ku dhammaaday magafayaal- baddeed lagu taageerayo doonyo caalami ah oo jarriif ah, kuwaas oo si ula kac ah u burburinaya riifyada qadiimiga ah ee badda iyo deegaanada kalluunka.

Kalluumeysiga aan sharciga ahayn (IUU) ee biyaha Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa inay Soomaaliya ka khasaarto adduun dhan ilaa $300 milyan sanadkiiba, taasoo ay si gaar ah u sameeyaan maraakiibta kalluumeysiga caalamiga ah ee reer Yurub, gaar ahaan Isbaanishka, iyo dalal kale oo ay ka mid yihiin Iiraan, Shiinaha, Baakistaan iyo Yemen, kuwaas oo loo oggol yahay inay ka howlgalaan 24 ilaa 200 nautical miles ee aagga gaarka ah ee dhaqaale Soomaaliya (EEZ).

Su’aasha inta badan la is-weydiiyo waxay tahay maxaa ku dhacay Soomaalidii adduunka miisaanka ku laheyd iyo maxay thaay sababta ay hadda hoos ugu dhacday dhamaan dhinacyada nolosha? Dalka Soomaaliya waxaa loo yiqiin “quruxdii ama caruusadii Afrika”, waxaana ka

hanaqaadey dimuqraadiyaddii ugu horreysay ee qaaradda Afrika, waxayna saldhig u aheyd halyeeyadii xorriyadda ee ka soo jeeday dalaka Kenya illaa Koonfur Afrika, iyo Angola illaa Zimbabwe. Ciidamadeenna ayaa ku dhexgalay khilaafkii u dhexeeya Tanzania iyo Uganda, waxayna ka caawiyeen heshiisyo nabadeed in laga dhaqangeliyo goobo kala duwan oo Afrika ah. Halyeeyada xoriyadda ee ka soo horjeeda Boqortooyadii Itoobiya, oo ay ku jiraan Meles Zenawi & Isaias Afwerki, ayaa muddo badan deganaa Soomaaliya iyagoo ku safraya baasaboor diblomaasiyadeed oo Soomaali ah, iyadoo ay weheliyeen halyeeyada xorriyadda ee dalal badan oo ka mid ah Afrika.

Jawaabta ugu kooban ee su'aasha ayaa ah hoggaamin la'aan (Leadership). Sida la wada ogyahay, hoggaamintu waa muhiim xilliyada adag ee ku suntan khilaafka siyaasadeed, rabshadaha, iyo masiibooyinka qaran, sida dagaalka sokeeye iyo khilaafaadka siyaasadeed ee muddo dheer jiitama, sida uu noqdey xaalka Soomaaliya maanta. Sida uu sheegay Neeley Kayn oo ka tirsan Jaamacadda Charleston Southern, isagoo ka hadlaya muhiimadda hoggaaminta, gaar ahaan dhinaca arrimaha bulshada, wuxuu yiri "asal ahaan, dhibaatooyinka lagama fakan karo, waa qeyb ka mid ah nolosha, laakiin guushu waxay ku xiran tahay sida dhibaatooyinkaas loo maammulo iyo sida hogaamintu u maareyso xaaladdaas."

Hogaamiyaha wanaagsan ayaa kor u qaadi kara xaaladda xilliyada ay jiraan arrimo degdeg ama khatar ah (emergency), halka hogaamiyaha xun uu horseedo burbur marka uu wajaho masiibo ama khatar. "Kartida hogaamiyaha ee la qabsan la'aanta xaaladaha aan caadiga aheyn ayaa sidoo kale saameyn taban ku yeesha dadka la shaqeynaya sidoo kale. Guusha ama burburka waxa go'aamiya sida ay uga jawaabaan hogaamiyaashu dhibaatooyinka iyo xaaladaha adag."

Hab-dhaqankan waa mid aad u khuseeya dalalka jilicsan (fragile states) sida Soomaaliya, halkaas oo hogaaminta wax-ku-oolka ah ay noqoto mid aad u muhiim ah. In kasta oo hogaamintu ay muhiim tahay waqtiyada oo dhan, waxayse aad muhiim u sii noqoneysaa xilliyada kacdoonka bulshadeed iyo khilaafaadka. Sidoo kale, Abhishek oo ka socda "Engagedly" wuxuu adkeynayaa in "tijaabada dhabta ah ee hogaamintu aysan dhicin marka wax walba si habsami leh u socdaan." Hogaaminta runta ah marar badan waxaa la tijaabiyaa ama ay soo shaac-baxdaa xilliyada dhibaatooyinka iyo duruufaha adag. Sida hogaamiyuhu u dhaqmo ama ula falgalo xilliga dhibaatooyinka ayaa go'aamisa aqoonsiga uu ku helayo inuu yahay hogaamiye wanaagsan ama liita.

Kadib afgembigii milatarigu hogaaminayeen ee 1969, wuxuu ahaa mid aan dhiig ku daadan, rajo badana laga qabey, hase yeeshee baabi'intii dastuurka dalka, xayiraaddii dimuqraadiyadda, iyo xoriyadda hadalka, iyo mamnuucidda xaqa isu-soo-baxa ayaa si daran loo dhaqangeliyay, iyadoo isla markaasna la mamnuucay xisbiyadii siyaasadda dalka. Xaaladaas adag ee dalka soo waajahdey inqilaabka kadib iyo xukun-maroorsigii ba'naa, hogaamiyeyaashii kacaanku waxay maamuleen cadaalad- darro baahsan oo ku wajahan ciddii ay u arkayeen inay mashruucooda ka hor iman karto, iyagoo mudnaanta siiyay ajendayaashoodii gaarka ahaa ee ay ugu weynayd in aysan xukunka dib ugu celin dadkii rayidka ahaa sidii ay hore u ballanqaadeen, intii ay ka fikiri lahaayeen baahiyaha bulshada iyo rajooyinkii muwaadiniinta.

Muddo ayay qaadatey in arrintaas saameynteedu ay soo shaac-baxdo, hase yeeshee dalku wuxuu si dhab ah u kala furfurmey ama u kala daatey kadib dagaalkii 1977, ee dhexmaray Soomaaliya iyo Itoobiya. Waxaan aad u xusuustaa sida xishood la'aanta ah ee loo dhunsanayey hantidii dadweynaha oo in yar uun u gacan galey, musuqmaasuqii baaxadda lahaa ee kheyraadka dalka, qaraabo-kiilka, hanti-boobka iyo ku-cayiliddii musuqa aan xisaabi-xil-ma-leh ka dambeyn. Dhiig-miiratadii ayaa dalka lagu fasaxey, halka ay hogaamiyayaashu ku cayileen hantidii ummadda xisaab la'aan. Xaaladda runta ah ee dalku galay waxaa si fiican loogu cabiri karaa odhaah ka timid suugaan-yahankii Soomaaliyeed ee la oran jirey Aadan Carab, ee la xiriirey waqtigii xornimadda la qaatey:

***Sidii baan macaash ugu gataa, harag miciinkiise,***
***Sidii baan midhaha uga gurtaa, madaxa toomoode,***

***Sidii baan u macaluushanahay, oo mud dhuubanahay, Sidii baan mawaashiga hayaan, ugu maqiiqaaye,***

*Sidii baan martida caana qudha, ugu macsuumaaye,*

*Sidii baan tacliin uga madhnahay, machadkii diimeede, Sidii baan madow ugu jiraa, maato iyo ruuxe,*

*Sidii baan xafiis meel fog jira, ugu muctaadaaye, Sidii buu kiniin ugu mutaa, maralka jiifaaye,*

*Sidii buu dalkii naga maqnaa, muran u joogaaye,*

*bal muxuu macnaayoo i tarey ministarkaan doortey?*

Dareenkaas adag oo ah in aan dowladnimadii waxba lagu faa'iidin iyo duruufihii ka dhashey oo aan kor ku soo tilmaaney ayaa ugu dambeyntii gacan ka geystay burburkii dalka iyo dagaalkii sokeeye, waxaana halkaas ka dhacey qaran-jabkii Soomaaliya.

Anigoo ka mid ahaa dadkii goobjooga u ahaa bilowgii dagaalka sokeeye, waxaan waqtigaas aaminsanaa in isbedel kasta oo hoggaamineed oo ka dhaca Villa Soomaaliya uusan iiga dareyn ama si toos ah u khuseyn amnigeyga maadaama ninkii guursada hooyaday uu noqonayo adeerkay.

Marnaba kuma fikirin in aan la kulmi khatar weyn oo gaarsiisan in aan ku waayi karo nafteyda iyo nolosheyda, sababtoo ah waxaan u dhashey qabiil hebel. Qabiilka aan u dhashey ma aheyn doorasho aniga xageyga ka timid ee waxay aheyd xukun Alle, inay dembi noqotana waa la-dirir xukunkii Alle. Waa kii lahaa abwaan Abshir Bacadle: "qaddarkeyga hiishee wallee qolo ma sheegteene". Dareenkaas xooga leh waxaan dhowaan ku diiwaangeliyey qormooyin taxane ah oo aan ugu magac-darey "Safarka Laba Kun ee Kiilomitir: Casharrada Dagaalkii Sokeeye ee Soomaaliya", oo laga heli karo qaybihii 1aad, 2aad, 3aad, iyo 4aad wargeyska caanka ah ee WardheerNews.

Markii dalka uu bilaabay inuu ka soo bogsado dagaalkii sokeeye iyo inuu dib u aasaaso dowladnimadiisa shirkii Carta ee Djibouti sanadkii 2000, hogaamiyayashii waqtigaas ayaan xor ka aheyn fikir qabiilka, iyagoo awoodi waayey inay si dhab ah u fahmaan xaalada culus iyo khatarta uu qarankeenu wajahayo. Nidaamkii awood-qabiileed ee 4.5 ayaa la qaatay oo la hirgeliyay si uu aasaas ugu noqdo qeybsiga kuraasta cusub ee baarlamaanka Soomaaliya. Ku tiirsanaanta qabiilka ayaa keentay in Dowladdii Kumeelgaarka Qaranka (TNG) ay noqoto mid ku kooban Muqdisho oo aan tallaabin.

Sannadkii 2004, markii la hirgeliyey nidaamka federaalka inta lagu guda jiray dhismaha Dowladdii Federaalka Ku-meel-gaarka ahyed (TFG) ee lagu soo dhisey Mbagathi, Kenya, waxaa ka dhashey nidaamka hab-maamulka hoos-ka-dhiska dalka. Nidaamka federaalku wuxuu tixgelin siinayaa xaaladda dhabta ah ee dalku marayey, maadaama Soomaalidu ay dib u kala guurtey, sida keliya ee lagu heli karo ammaan, xasillooni, arrimo-bulsho sida waxbarasho iyo caafimaad waxay noqotey in degaanaddu yeeshaan maamul baahsan oo ka jawaabi kara baahiyaha jira.

Dhammeystirkii Dastuurka KMG ah ee 2011/12 waxaa loo qorsheeyay in uu horseedo heshiis bulsho oo bilow u noqda dowlad dib-u-heshisiin waarta, waxaana loo qaabeeyey hab-macquul ah oo awood-wadaag iyo xal-cadaaladeed ku dhisan, kaasoo caawinaya dib-u-dhiska dowladnimo casri ah. Taas bedelkeeda, Dowladda Federaalka Soomaaliya (FGS) waxay u dhaqmeysaa sidii inay tahay awooda-sharci ee keliya ee dalka ka jirta (sole legitimate authority) si ka soo horjeeda Dastuurka KMG, iyada oo u dhaqmeysa sidii dowlad awooddu u mideysan tahay, kuna caan baxdey oraahda in aan "cidna aan u joojineyn". Dhaqankan wuxuu ku soo koobaa awooda dowladda dhexe, iyadoo markaas u qeybisa awoodda xukunka sidii iyo dhinicii ay doonto.

Intaas waxaa sii dheer, FGS waxay si xun u isticmaaleysay xakameynta hawada Soomaaliya, markii ay kala soo wareegtay Hay'adda Caalamiga ah ee Duulimaadka Madaniga (ICAO), iyadoo awooddaas u isticmaashey si ay u xaddido xoriyadda safarka muwaadiniinta iyo dhaq-dhaqaaqooda, taasoo inta badan keenta dhibaato qof kasta oo safar u aadaya gobollada aanu xiriirka togan kala dhexayn Villa Soomaaliya, iyadoo ku tumaneysa xuquuqdii dastuuriga ahayd ee qofka Soomaaliyeed.

Sidaas oo kale, dowlad-goboleedyadii ku koobnaa magaalooyinka caasimadaha u ah ayaa iyaguna doortay inay xoogga saaraan sidii ay awoodda dowlada ugu soo koobi lahaayeen xarumaha dowlad-goboleedyada, iyagoo ka hor-imanaya nidaamka federaalka saxda ah, kaas oo ka kooban saddex heer oo maamul: dowladda dhexe, dowlad-goboleedyada, iyo dowladdaha hoose ee heer deegaan. Si kastaba ha ahaatee taas bedelkeeda, waxaa awooddii dowladnimo lagu koobay xarumaha dhexe ee dowlad-goboleedyada, taas oo

keentay nooc qaldan oo nidaamkii federaalka ah oo aan si weyn looga aqoon caalamka intiisa kale.

Waa muhiim in la ogaado in hogaamiyeyaasha heerarka dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyaduba ay si joogto ah u fashilmeen inay wax ka qabtaan arrimaha hab- maamul dowladnimo (governance), taas oo keentay heerar aan hore loo arag taariikhda Soomaaliya, oo ah musuqmaasuq iyo isticmaalka khaldan ee hantida dadweynaha. Natiijada boobkaas ka dhalatey waxay noqotey Soomaaliya ku fashillantey inay ka gudubto xayndaabka dowlad daciif ah (fragile state), iyadoo si joogto ah u muujisay heerka waxqabad-dowladnimo ee ugu liita adduunka marka laga eego hufnaanta (transparency), isla-xisaabtanka (accountability) iyo maamul- wanaaga (good governance) adduunka oo dhan.

Sida lagu xusay warbixintii ugu dambeysay ee qiimeynta heerka musuqmaasuqa (corruption index) ee ay soo saarto Transparency International sannad kasta (CPI), Soomaaliya waxay heshay 9 dhibcood marka loo eego 100-kii dhibcood. Tani waxay ka dhigeysaa in ay ku jirto kaalinta 179-aad oo ugu hooseysa 180-ka dal ee la qiimeeyey, iyadoo loo aqoonsadey waddanka ugu musuqmaasuqa badan caalamka. Tan iyo sanadka 2000, madaxweyne kasta oo la doortay wuxuu diiradda saaray tartanka dib-u- soo-doorashadiisa maalintiisii ugu horreysay ee uu xafiiska yimaado, wuxuuna si cad isu illowsiinayey ballankii iyo dhaartii dastuuriga aheyd ee uu xafiiska ku yimid, taas oo ahayd in uu u shaqeeyo dadka iyo dalka. Runtii, dhamaan madaxweynayaashii soo marey midna ma sixin qaladkaas (almost every president got it wrong).

Sida uu u dhigey Ismaaciil Xaaji Warsame ee Warsame Digital Media (WDM) “Masiibada Soomaaliya ma ahan keliya jiritaanka Al-Shabaab, laakiin waa xasuus-guurka bulshada oo ogolaanaya in dambiilayaashii shalay ay maanta u dhalan-rogtaan badbaadiyayaasha maanta. Dagaal-oogayaashii waxay noqdaan wasiirro, xagjirkii waxay noqdaan isbedel-doon, kuwii taageersanaa maleeshiyaadkuna waxay noqdaan “mudanayaal maamus leh”. Haddii Soomaaliya aysan soo saarin hogaamiyayaal sida Aadan Cabdulle Cismaan iyo Cabdirisaaq Xaaji Xuseen oo kale ah, oo u dhigma liiska Nakruuma, Naasir, iyo Nelson Mandela.

Waxaa aad u sii yaraaneysa fursadda ah in dalku uu ka baxo xaaladda joogtada ah ee jilicsanaanta (fragility status), innagoo ku guuldarreysanay difaacidda madax-bannaanida iyo midnimada dhuleed ee dalkeena, innagoo awoodi kari wayney in aan dalkeena ka difaacno waraabayaasha meydkiisa sugaya.

**W/Q:** Ali Haji Warsame

# BOOSAASO: MAGAALO FURSAD HAYSATA OO LA DAALAA DHACAYSA MAAMUL FADHIID AH



Cabdiraxmaan Maxamuud Siciid



**Xigashada Sawirka**: Deeq Awaare

# HORDHAC

Boosaaso waxay ka mid tahay magaalooyinka ugu muhiimsan ee Puntland iyo guud ahaan Soomaaliya, waxaa muddooyinkii u dambeeyay ay la kulantay isbeddello dhaqaale, bulsho iyo dhisme oo waaweyn. Isbeddelladan ayaa magaalada ka dhigay xarun ganacsi oo istaraatiiji ah oo isku xirta gudaha dalka iyo suuqyada gobolka, taasoo ay sahashay dekedda sida firfircoon u shaqaynaysa, goobta ay kutaal oo istaraatiiji ah oo kulaalaysa marinno caalami ah iyo jawiga maalgashi oo soo jiita maalgelinta gudaha iyo dibadda. Si kastaba ha ahaatee, kobocan degdegga ah waxa la socda caqabado dhowr ah oo la xiriira dhanka maamulka iyo hirgelinta qorshe horumarineed oo waara.

Caqabadaha ugu waaweyn waxaa ka mid ah kaabayaasha dhaqaalaha oo hooseeya, sida waddooyinka iyo korontada kuwaas oo aan la jaanqaadi karin baahiyaha sii kordhaya ee degmada Boosaaso. Waxa kale oo jira caqabado maamulka iyo qorshaynta la xiriira, oo ay ka mid yihiin gaabiska nidaamyada hirgelinta mashaariicda sida loo qorsheeyay iyo isku-duwid la'aanta hay'adaha kala duwan. Dhanka bulshada iyo dhaqaalaha, weli waxaa jira farqi dhaqaale oo u dhexeeya bulshada, iyadoo shaqo la'aanta dhalinyarada iyo shaqaalaysiinta aan cadaaladda ahayn ay sii xumaynayaan xaaladda. Arrintani waxay muujinaysaa baahida loo qabo siyaasad horumarineed oo dhammaystiran oo wax ka qabata caqabadahan isku xiran.

Iyadoo ay jiraan caqabadahaas aadka u badan haddana dhanka fursadaha, Boosaaso waxa ay leedahay awood weyn oo ay kaga mid noqon karto magaalooyinka ugu horumarsan Soomaaliya. Dekedda mashquulka ah iyo ku dhowaanshaha marinada ganacsiga caalamiga ah waxay fursad u siinayaan in la xoojiyo kaalinta ganacsi iyo hormarineed. Ganacsiga gaarka loo leeyahay ee firfircoon ayaa sidoo kale keenaya hal-abuurnimo, gaar ahaan qaybaha gaadiidka badda, ganacsiga iyo adeegyada maaliyadeed, taas oo u fududaynaysa in la dhiso iskaashi dowladeed iyo mid ganacsi gaar loo leeyahay. Tirada badan ee dadka da'da yar ayaa iyaguna ah awood muhiim ah oo kor u qaadi karta wax-soo-saarka haddii si wanaagsan loo tababaro looguna diyaariyo suuqa shaqada.

Maqaalkaan waxaan ku falanqayn horumarka Boosaaso iyo caqabadaha iyo fursadaha jira, aniga oo soo bandhigaya faham ku saabsan xaalada hadda ay ku sugantahay, waxaana soo jeedin talo-bixino.

# MAAMULKA FADHIIDKA AH EE GOLAHA DEEGAANKA BOOSAASO

Boosaaso waxay leedahay Qorshaha Horumarineed ee Degmada (DDF) kasoo si cad u qeexaya adeegyada muhiimka ah, qorshayaasha horumarineed, iyo doorka maamulka deegaanka ee hagaya qorsheynta iyo fulinta adeegyada bulshada. Si kastaba ha ahaatee, marka la eego hab-dhaqanka maamul iyo qaab-dhismeedka Golaha Deegaanka, waxa muuqata in uu jiro maamul fadhiid ah (static governance) oo aan ka jawaabin baahiyaha sii kordhaya ee bulshada iyo qorshayaasha xooggan ee ku qoran DDF-ka. Inkasta oo DDF-ku dhisay jihada saxda ah, haddana fulinteeda iyo maamulka ku hagaya ayaa weli la il daran caqabado maamulka.

DDF-ku wuxuu qeexayaa yoolal cad oo ku saabsan kor u qaadidda adeegyada caafimaadka, biyaha, waxbarashada iyo kaabayaasha dhaqaalaha, iyadoo Golaha Deegaanka laga filayay inuu kormeero, qorsheeyo oo hirgeliyo adeegyada bulshada kadib doorashooyinkii tooska ahaa ee dadwayne oo golaha deegaanka ay dadku soo doorteen. Si kastaba ha ahaatee, DDF-ka laftiisa ayaa muujinaya in maamulka degmada uu la daalaa dhacayo shaqaalaha dowladda hoose oo aan haysan xirfado ku filan (municipal staff capacity gap), dowladda hoose ilaheeda dhaqaale oo xadidan (limited government resources)" iyo kaabayaasha dhaqaalaha oo hooseeya iyo qorshe magaalo oo daciif ah (poor infrastructure and weak urban planning)" Tani waxay muujinaysaa in Golaha Deegaanka uu ku shaqeeyo awood maamul oo hooseysa taas oo sabab u noqotay in ay ku ekaadaan kormeer aan lahayn fulin muuqata.

Golaha Deegaanka ma laha habab joogto ah oo lagu cabbiro waxqabadka, laguna qiimeeyo qorshaha DDF-ka, waxaana jira gaabis weyn oo ku saabsan xiriirka ka dhexeeya maamulka iyo bulshada,waxayna ka mid tahay sababaha keenay maamul fadhiid ah.

Inkasta oo DDF-ku sheegayo in bulshadu si wanaagsan uga qaybqaadatay "community consultation", haddana qodobada bulshada ay

soo jeediyeen si buuxda looma hirgelin. Arrimahan waxay muujinayaan in maamulka hoose uu lumiyey dheellitirkii u dhexeeyey baahida bulshada iyo awoodda maamulka.

Sidoo kale, ku tiirsanaanta xad-dhaafka ah ee adeegyada gaarka loo leeyahay sida biyaha, korontada, shirkadaha nadaafadda iyo caafimaadka waxay keentay in maamulka dowladda hoose uu lumiyo mas'uuliyaddii hagista adeegyada aasaasiga ah. DDF-ku wuxuu caddeeyey in shirkadaha gaarka loo leeyahay ay bixiyaan dhammaan adeegyada muhiimka ah, taas oo sababtay in Golaha Deegaanka uu noqdo maamul aan firfircoonayn oo aan maamulin ama si buuxda u maamulin adeegyada bulshada.

Saamaynta maamulkan fadhiidka ahi waxay ka muuqataa meelo badan, bulshada ku nool Boosaaso waxay qabaan baahiyo badan sida korondata oo qaali ah, waddoonyinka oo ciriir ah, wadada halbowlaha u ah magaalada Boosaaso oo jajaban godad bandanna ay ka qodmeen, nadaafadda oo hoosaysa taasoo aad dareemayso marka ugu horaysa oo aad Boosaaso gelayso. Waxaana muuqata in maamulka iyo golaha deegaanka oo ay bulshado soo dooratay aysan waxba ka qaban, taas oo wiiqaysa kalsoonida bulshada iyo hufnaanta maamulka dawladda hoose ee degmada Bosaso.

## FURSAHAHA IYO CAQABADAHA DEGMO BOOSAASO

Boosaaso waa magaalada ugu weyn Puntland, waana xarunta ganacsi oo sanadba sanadka ka dambeeya sii koraysa. Sidaa darteed, maamulka degmada waxaa laga filayaa inuu bixiyo adeegyo bulsho oo joogto ah, hufan, isla markaana daboolaya baahida sii kordhaysa ee shacabka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa muuqata in adeeg-bixinta degmada ay wajahayso caqabado waaweyn oo saameynaya tayada adeegyada, halka dhinaca kale ay jiraan fursado muhiim ah oo ay degmadu u adeegsan karto horumar waara. Caqabadda koowaad ee degmada Boosaaso lagu arko waa hoosaynta kaabeyaasha magaalada. Kaabeyaasha sida wadooyinka, biyo-mareennada, goobaha dadweynaha, iyo dhismayaasha adeegyada bulshada ayaa si weyn u hooseeya marka loo eego koboca dadka iyo dhaqdhaqaaqa ganacsi ee magaalada. Wadooyin xaddidan ee burbursan ayaa adkeeya isu-socodka, iyagoo yaraynaya gaarsiinta adeegyada caafimaadka iyo nadaafadda ee xaafadaha fog, sidoo kale waxay xadidi karaan daminta marka uu dab koco. Waxaa sidoo kale jirta adeeg koronto oo qaali ah, taasoo wiiqaysa hawlaha ganacsiga, shaqooyinka maalinlaha ah, iyo howlaha xarumaha caafimaadka iyo waxbarashada.

Sidoo kale, waxbarashada magaalada ayaa weli u baahan horumar ballaaran. Dugsiyo badan oo Boosaaso ku yaal ma haystaan agab iyo qalab ku filan, halka macallimiinta qaarkood ay haysato tababar la'aan joogto ah. Ardayda ku nool xaafadaha fog-fog iyo goobaha barakacayaasha mararka qaar waxay la kulmaan caqabado ku saabsan helitaanka dugsi u dhow ama dugsi leh adeegyo tayo leh. Waxaa intaa dheer, maamulka nadaafadda degmadu weli si buuxda uma dabooli karo baahida magaalada oo sii ballaaranaysa. Qashinka oo meelaha qaarkood ku urura, biyo fadhiya xilli roobaadyada, iyo la'aanta nidaam qashin-qaad joogto ah waxay khatar ku tahay caafimaadka bulshada iyo muuqaalka deegaanka.

Adeegyada caafimaadka ayaa ah kuwo aan gaarin heerkii ay ahayd inay gaaraan magaalo sida Boosaaso oo kale ah. Tani waxay ku khasabtaa dad badan in ay u safraan meelo kale si ay u helaan adeeg caafimaad oo wanaagsan. Waxaa sidoo kale jira tabar-darro muuqata oo ku saabsan helitaanka fayadhowr sax ah, gaar ahaan dadka ku nool xaafadaha danyarta ah, taas oo saamayn ku yeelata caafimaadka guud ee bulshada.

Awoodda shaqaalaha oo daciif ah waxay hoos u dhigtay tayada adeegyada lagu hirgelin karo degmada. Waxaa intaa dheer, ka-qaybgalka bulshada ee go'aan qaadashada degmada ayaa weli hooseeya, taasoo sabab u noqota in mashaariicda qaar aysan bulshada u arkin kuwo daboolaya baahidooda dhabta ah.

Dhanka fursadaha, Boosaaso waxay haysataa fursado badan oo ay ku gaari karto horumar muuqda. Midda koowaad waa fursadda lagu xoojin karo xirfadaha iyo aqoonta shaqaalaha degmada. Tababarro casri ah oo loo sameeyo shaqaalaha waxay sare u qaadi karaan qaab shaqo, maareyn xogeed, xisaabtan iyo hufnaan adeeg. Waxa kale oo jirta fursad lagu kordhin karo maalgelinta degmada, maadaama Boosaaso tahay xarunta ganacsiga Puntland. Haddii dowladda iyo hay'adaha taageera ay kordhiyaan maalgelinta, waxaa suurtagal noqon kara in la dhiso wadooyin cusub, la casriyeeyo xarumaha caafimaadka, lana ballaariyo adeegyada nadaafadda.

Fursad kale oo muhiim ah waa kor u qaadista ka-qaybgalka bulshada. Bulshada Boosaaso aad bay u firfircoon yihiin, gaar ahaan dhallinyarada, waxaana jira awood weyn oo lagu dhisi karo wadashaqeyn wanaagsan oo u dhexaysa maamulka iyo bulshada. Tani waxay horseedi kartaa in la abuuro siyaasado iyo mashaariic si dhab ah u daboola baahida shacabka. Sidoo kale, tiknooloojiyada casriga ah waxay siin kartaa degmada fursad ay ku horumariso adeeg bixinta iyadoo loo adeegsanayo nidaamyo elektaroonik ah oo fududeynaya in shacabka cabashadooda, taladooda, iyo warbixintooda la gaarsiiyo maamulka.

## TALOOYIN

Sida aan ku sheegay maqaalka in Boosaaso leedahay fursado badan oo muhiim ah sida dekedda istaraatiijiga ah, kororka bulshada da'da yar, iyo firfircoonida ganacsiga haddana magaalada waxa hortaagan caqabado waaweyn oo la xiriira maamul fadhiid ah, kaabeyaal daciif ah, adeegyo bulsho oo aan dhammaystirnayn, iyo ka-qaybgal bulsho oo xaddidan. Sidaas awgeed, talooyinkan hoos ku qoran waxay diiradda saarayaan sidii loo abuuri lahaa xoojinta maamulka iyo awoodda shaqaalaha, kaabeyaal waara, adeegyo bulsho oo tayo leh, iyo wada-shaqeyn adag oo u dhexaysa maamulka iyo bulshada, sida darteed maqaalkan waxa u u soo jeedinayaa:-

Xoojinta Maamulka iyo Awoodda Shaqaalaha: In si buuxda loo dhiso oo loo casriyeeyo maamulka degmada, loona sameeyo tababarro joogto ah oo kor u qaada awoodda shaqaalaha, isla markaana la hirgeliyo nidaam isla-xisaabtan cad.

Dib-u-qaabaynta Kaabayaasha Magaalada: In la dayactiro lana ballaariyo kaabeyaasha muhiimka ah sida waddooyinka, biyomareennada, iyo goobaha danta guud si ay ula jaanqaadaan koboca dadka iyo dhaqaalaha.

Hagaajinta Adeegyada Bulshada (Caafimaad, Waxbarasho & Nadaafad): In la kordhiyo tayada adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada, lana casriyeeyo nidaamka qashin-gurka iyo nadaafadda si loo yareeyo khataraha caafimaad iyo wasakhowga deegaanka.

Kor u Qaadista Ka-Qaybgalka Bulshada: In la abuuro madallo rasmi ah oo bulshada ku soo gudbin karto talooyinka iyo cabashooyinka, lana xoojiyo ka-qaybgalka dhallinyarada iyo ururrada bulshada ee go'aannada degmada wax ku leh.

Sameynta Qorshe Magaalo oo Waara (Urban Master Plan): In Boosaaso yeelato qorshe horumarineed oo muddo-dheer ah oo qeexaya ballaarinta magaalada, adeegyada muhiimka ah, maareynta qashinka, goobaha danta guud iyo qorshe hawlgal oo cad.

**W/Q:** Cabdiraxmaan Maxamuud Siciid

# XANNAANADDA CARRUURTA: AASAASKA MUSTAQBALKA WAXBARASHADA PUNTLAND



Asmaa Dr. Cabdulqaadir Maxamed



**Xigashada Sawirka**: Lighthouse School Garowe

# HORDHAC

Xannaanadda Carruurta (ECE) waa tallaabo asaasi ah oo muhiim u ah kobaca waxbarashada, horumarinta bulshada, iyo xoogga dhaqaale ee mustaqbalka Puntland. Sanadaha hore ee nolosha ilmaha gaar ahaan da'da u dhaxaysa 3–5 sano ayaa ah kuwa ugu nugul horumarinta maskaxda, iyadoo 75% horumarka maskaxdu ku dhammaado da'da saddex sano. Inta lagu jiro marxaladdan, carruurtu waxay u baahanyihiin deegaan ammaan ah, daryeel joogto ah, nafaqo ku filan, iyo barnaamijyo waxbarasho oo tayaysan si ay u gaaraan awooddooda buuxda.

Siyaasadda Xannaanadda Carruurta ee Puntland (2021) waxay xoojisay in ECE ay saldhig u tahay horumarinta garashada, bulshada, dareenka, iyo jidhka ilmaha, isla markaana ay si toos ah u saameyso diyaar-garowga dugsiga, wax-qabadka fasallada hore, iyo natiijooyinka waxbarasho ee muddada fog. Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee Waxbarashada (ESSP) waxa uu ECE ku tilmaamaa qayb muhiim u ah gaarista sinnaanta waxbarashada, kor-u-qaadista tayada, iyo yaraynta caqabadaha ku hor gudban fasallada hoose.

Xogaha iyo natiijooyinka JRES waxay muujinayaan in carruurta soo mara xannaanadda hore ay helaan faham wanaagsan oo ku saabsan akhriska, xisaabta, dhaqanka bulshada, iyo is-xakamaynta, taas oo u fududeysa inay si dhakhso leh ula qabsadaan dugsiga asaasiga ah. Sidoo kale, ECE waxay leedahay saamayn dhaqaale iyo bulsho oo fog, iyadoo daraasado iyo siyaasadda Puntland ay muujinayaan in kor u qaadidda adeegyada xannaanadda hore ay keento faa'iidooyin waxtar leh oo muddo dheer saameeya horumarka ilmuhu ku gaaro waxbarasho, shaqo, iyo caafimaad.

Si kastaba ha ahaatee, Puntland weli waxay wajahaysaa caqabado ay ka mid yihiin: nidaam mideysan oo maamul iyo kormeer ah oo aan weli si buuxda u shaqayn, macallimiin tababaran oo yar, helitaan kooban oo gaar ahaan saameeya carruurta miyiga iyo barakacayaasha, iyo maalgelin aad u hooseysa maaddaama ECE ay tahay qaybta ugu yar ee miisaaniyadda waxbarashada.

Haddaba, xoojinta Xannaanadda Carruurta waxay muhiim u tahay hagaajinta natiijooyinka waxbarashada mustaqbalka, yareynta sinnaan la'aanta, iyo dhisidda awoodda aadanaha ee Puntland. Adkaynta siyaasadaha jira, kor u qaadidda tayada, ballaarinta helitaanka adeegyada, iyo xoojinta xog-ururinta iyo isku-duwidda hay'adaha ayaa ah tallaabooyin lagama maarmaan u ah dhismaha nidaam ECE oo hufan oo wax-ku-ool ah.

# ASAASKA XANNAANADDA CARRUURTA

Xannaanadda Carruurta ee Puntland waxay diiradda saaraysaa horumarinta ilmaha ee dhinacyada: garashada, dareenka, bulshada, iyo dhaqdhaqaaqa, iyada oo loo marayo waxbarasho ku dhisan ciyaar, dhaqanka deegaanka, iyo habab da' ku habboon.

Mabaadi'da siyaasadda ECE waxay ku salaysan yihiin:

- ilaalinta xuquuqda ilmaha
- u-sinnaanta iyo ka mid noqoshada
- ka qaybgalka bulshooyinka iyo waalidiinta
- iskaashi u dhexeeya waxbarashada, caafimaadka, iyo adeegyada bulshada

Qorshaha ESSP waxa uu xoojiyay in ECE ay qayb ka tahay yoolka SDG 4—hubinta in dhammaan carruurta, wiilal iyo gabdho, ay helaan horumarinta carruurnimada hore oo tayo leh.

# SAAMAYNTA XANNAANADDA CARRUURTA EE HORUMARKA WAXBARASHADA MUSTAQBALKA

1. **Horumarka Garashada iyo Waxbarashada (Cognitive and Academic Outcomes)**

Xannaanadda Carruurta waxay kobcisaa xirfadaha akhriska, xisaabta, luqadda, iyo xallinta dhibaatooyinka. Xogaha EMIS iyo qiimeyntii JRES waxay muujiyeen in carruurta mara ECE ay aad uga wanaagsan yihiin fasalka koowaad marka loo eego diyaar-garowga iyo waxqabadka hore.

2. **Horumarka Bulshada iyo Dareenka (Social and Emotional Development)**

ECE waxay xoojisaa kalsoonida ilmaha, is-xakamaynta, la dhaqanka bulshada, iyo awoodda uu ilmahu ugu diyaar garoobo dugsiga. Tani waxay yaraysaa dhacdooyinka soo noqnoqda iyo ka tegista dugsiga ee fasallada hoose.

3. **Faa'iidooyinka Dhaqaale iyo Bulsho ee Mustaqbalka (Long-Term Socioeconomic Benefits)**

Siyaasadda Puntland waxay tilmaamaysaa in maalgelinta ECE ay bixiso soo laabasho dhaqaale oo u

dhaxaysa 7–13% sannadkii. Carruurta hela ECE waxay yeelanayaan waxbarasho dheer, fursado shaqo oo wanaagsan, iyo ka fogaansho guurka da'da yar iyo shaqooyinka nugul.

4. **Xaaladda Hadda ee Xannaanadda Carruurta ee Puntland**

Xannaanadda Carruurta ee Puntland weli waa mid aan si fiican loo nidaamin. Waxbarashada ugu badan waxa ay ka dhacdaa:

- Masaajidda (dugsi Qur'aan),
- Xarumo gaar loo leeyahay
- Waxbarasho lagu dhighto xaafadaha

ESSP waxay muujinaysaa in carruur badan oo reer miyiga iyo barakacayaasha ahi ay ka maqanyihiin adeegyada, iyadoo sabab ay u tahay masaafo dheer, dhaqaale, iyo wacyigelin la'aan. Intaa waxaa dheer, ECE waa sub-sector-ka ugu miisaaniyadda hooseeya, oo hela qiyaas ahaan 0.02–0.03% miisaaniyadda waxbarashada.

## CAQABADAHA HORTAAGAN BALLAARINTA ECE

Caqabadaha ugu waaweyn waxaa ka mid ah:

- Maqnaanshaha nidaam mideeya diiwaangelinta iyo kormeerka xarumaha ECE
- Macallimiin tababaran oo yaraada iyo mushahaar aad u hooseeya
- Fursado yar oo loogu talagalay carruurta naafada ah, kuwa miyiga, iyo kuwa saboolka ah
- Wacyigelin la'aan ka dhex jirta bulshada iyo waalidiinta oo aanay garanayn faa'iidooyinka ECE iyo da'da saxda ah ee carruurtu bilaabi karaan waxbarashada
- Ammaanka iyo diyaar-garowga xarumaha ECE oo aan mar walba la hubin, taasoo saameyn ku yeelanaysa tayada iyo helitaanka waxbarashada
- Miisaaniyad aad u kooban oo aan dabooli karin baahida jirta

## DOORKA WAXBARASHADA XANNANADA CARUURTA EE HAGAAJINTA WAXBARASHADA PUNTLAND

1. **Kordhinta Diyaargarowga Ardayga**

Carruurta soo mara ECE waxay si sahlan ugu gudbaan fasalka koowaad, waxayna leeyihiin xirfado aasaasi ah oo u suurtogeliya inay si fiican ula qabsadaan nidaamka waxbarashada.

2. **Hagaajinta Natiijooyinka Waxbarashada**

ECE waxay yareysaa baahida waxbaridda dheeraadka ah (remedial learning) ee fasallada hore, waxayna kordhisaa wax-soo-saarka guud ee nidaamka waxbarashada.

3. **Horumarinta Sinaanta**

ECE waxay yareysaa farqiga u dhexeeya magaalada iyo miyiga, waxay taageertaa carruurta naafada ah, waxayna awood siisaa gabdhaha inay dugsiga si joogto ah u dhammaystaan.

4. **Dhisidda Awoodda Aadanaha**

In la helo nidaam ECE oo xooggan waxay kaalin muhiim ah ka qaadataa kobcinta dhaqaalaha, fayo-qabka bulshada, iyo horumarinta shaqaalaha mustaqbalka.

## ISTIRAATIIJIYADA XOOJINTA ECE EE PUNTLAND

Kordhinta helitaanka: Waa arrin muhiim u ah in dhammaan carruurta Puntland, gaar ahaan kuwa nugul, ay helaan fursad waxbarasho oo tayo leh. Waxaa kamid ah balaarinta xarumaha ku salaysan bulshada si carruurta looga dhigo kuwo si sahlan u gaari kara, isku-dhafka xarumaha Qur'aanka iyo ECE si loo helo adeegyo waxbarasho oo isku dhafan, iyo fidinta taageero gaar ah oo loogu talogalay carruurta leh baahiyo gaar ah, kuwa miyiga ku nool, iyo carruurta ay dhaleen qoysaska dakhligoodu hooseeyo.

Hagaajinta Tayada: Waxbarashada ayaa sidoo kale muhiimad gaar ah leh, iyadoo la hirgelinayo manhaj midaysan, tababar joogto ah oo la siiyo

macallimiinta, iyo abuurista jawi waxbarasho oo ammaan ah oo dhiirigeliya horumarka ilmaha. Tani waxay ka caawisaa in carruurta loo diyaariyo natiijooyin waxbarasho oo wanaagsan iyo horumar bulsho oo waara.

Kordhinta maalgelinta: Waa arrin muhiim u horumarinta iyo sii wadida xarumaha Xannaanadda Carruurta ee Puntland. Dowladda, hay'adaha caalamiga ah, iyo qaybta gaarka loo leeyahay ayaa la filayaa inay ka qaybqaataan maalgelinta si loo hubiyo in xarumaha ECE ay si waara u shaqeeyaan, si loo kordhiyo tirada xarumaha, loona horumariyo tayada waxbarashada. Maalgelintani waxay sidoo kale gacan ka geysaneysaa in la taageero macallimiinta, la helo agab waxbarasho oo ku filan, iyo in la abuuro jawi waxbarasho oo ammaan ah oo dhiirrigeliya horumarka carruurta.

Kobcinta ka qaybgalka waalidiinta iyo bulshada: Kobcinta ka qaybgalka waalidiinta iyo bulshada ayaa sidoo kale la xoojinayaa, maadaama ay yihiin daryeelayaasha ugu horreeya ee ilmaha. Waalidiinta iyo bulshada waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay ka qaybqaataan hawlaha xarumaha ECE, isla markaana ay fahmaan faa'iidooyinka waxbarashada carruurta yaryar iyo waqtiga saxda ah ee ilmaha lagu bilaabi karo.

## GUNAANAD

Xannaanadda Carruurta waa mid ka mid ah qaybaha waxbarashada ugu wax ku oolka badan ee Puntland samayn karto si loo gaaro sinnaan, tayo waxbarasho, iyo horumar bulsho oo waara. Xoojinta ECE waxay si toos ah u hagaajinaysaa diyaargarowga dugsiga, natiijooyinka waxbarasho, iyo awoodda ilmaha ee mustaqbalka. Haddii si buuxda loo dhaqangeliyo siyaasadda Puntland ee ECE, iyadoo la xoojinayo nidaamyada, la kordhinayo maalgelinta, lana mideynayo hawlaha hay'adaha, Puntland waxay dhisi kartaa jiil aad u diyaarsan oo leh awood waxbarasho, dhaqaale, iyo bulsho oo adag.

**W/Q:** Asmaa Dr. Cabdulqaadir Maxamed



# NIDAAMINTA NOLOSHA IYO ARAGTIDA ISLAAMKA



Maxamed Nadiif Showkaani



# ARAR

In badan waxaan maqalnaa, soo noqnoqoshada erayo ay ka mid yihiin (nidaam, hab, qaab dhismeed dowladeed, yagleelida aayaha iyo ka tashiga hab dhismeedka nolol wanaagsan), waxaa kuwaas ka soo hor jeeda (fowdo, qas iyo qalalaase, iska soo horjeed, kala tag iyo kala qubad, ummad kala qoqoban iyo qalbiyo kala jeeda, is hayn, kala yaac); hadaba maxaa Islaamku ka qabaa in wax la habeeyo? Ama la sameeyo nidaam kala danbeyneed ama kala amar qaadasho oo loo aayo xilliyada is haynta iyo is maandhaafka? Koonkiisa Ilaahay ma waxa asaas u ah nidaam iyo hab kala sarayn maamul iyo is adeecid mase waxaa ka jira fowdo iyo kala tagsanaan iyo isku dhex yaac?.

Haddaba innagoo ka duulayna is waydiimahaas, aan isku dul-taag yar oo kooban ku samayno falsafada ama aragtida uu ka qabo Islaamku qaabaynta ama nidaaminta arrimaha nolosha dhinac kasta oo ay tahayba.

# KELIYEELIDA EEBE WEYNE

Keliyeelidda Eebe wayne waxay tusaale cad oo hor tebin leh u tahay sida Eebe u nidaamiyey koonka si guud, asagoo ka dhigay jihada keli ah ee iska leh maamulka iyo tasarufka koonka oo dhan.

Sidii taas laguu tusana, waxaa si cad oo aan har saarnayn Kitaabka Quraanka ahi meesha ka saaray jirrida ilaahyo kale oo koonka la wadaaga ama la maamula. Eebe weyne wuxuu Quraanku ku leeyahay sidatan:

1. 1. Waxaa tiraahdaa (Nebi Muxamadow) haddii ilaahyo la jiri lahaayeen sida ay leeyihiin; markaas kan carshiga iska leh bay wado ay kaga adkaadaan u raadsanlahaayeen.

**قال تعالي: { قُل لَّوْ كَانَ مَعَهُ آلِهَةٌ كَمَا يَقُولُونَ إِذًا لَّابْتَغَوْا إِلَىٰ ذِي الْعَرْشِ سَبِيلًا} الإسراء** 42.

2. Haddii ilaahyo kale ka jiri lahaayeen cirka iyo dhulka, way fasahaadin lahaayeen, ee Ilaahay baa ka nasahan oo kan carshiga rabigiis ah waxay sheegayaan.

**قال تعالى: { لَوْ كَانَ فِيهِمَا آلِهَةٌ إِلَّا اللَّهُ لَفَسَدَتَا فَسُبْحَانَ اللَّهِ رَبِّ الْعَرْشِ عَمَّا يَصِفُونَ} الأنبياء ٢٢ .**

3. Eebe ilmo maleh, ilaah kalena la jirkiisa maaha, haddii saas ay jiri lahaydna, mid walba wixii uu abuuray buu la tegi lahaa, qaarba qaarka kale bay ka sarrayn dalbi lahaayeen, ee Ilaahay baa ka hufan waxa ay tilmaamayaan.

Sadexdaas aayadood waxay si cad u diideen in ilaahyo badan ay jiraan; cillada lagu saleeyey jiritaan la'aantoodana waxa laga dhigay inaan koonku sii jireen, oo baabi'in lahaa, is xoogidooda iyo is hayntooda daraadeed, taasina waxay noo sheegaysaa in koonka hal maamul ka jiro, oo uu Eebe weyne bes iska leeyahay gacan ku haynta, maamulida iyo ku tasarufidda koonka.

# MALAA'IGTA IYO HAB MAAMULKOODA

Malaa'ig Eebe waxa uu u sameeyey hab ay isu hoostagaan oo shaqooyinka u gutaan, mid kastana shaqada uu maamulo kuwa hoos tagaa asaga hor-imaad, isku taag iyo fadqalalo kuma furaan, taasina – inkastoo malaa'igtu Eebe caabudidiisa ay ku abuuranyihiin–haddana arinka is garab yaac lagama dhigo ee madax qaybeedyo baa loo sameeyay laga amar qaato, waxyaabaha ku tusinaya waxaa ka mid ah in Eebe markuu qof aadanaha ka mid ah uu u muujinayo jacayl waxaa la amraa Jibriil inuu jeclaado cida samada joogtana uu amarkaas siiyo, sidaas buuna sameeyaa.

Malaa'igtu shaqada ay kala leeyihiin ee loo kala asteeyey cidina iskuma qalado ama cidi cid kale shaqadeeda faraha lama gasho, oo malagga geerida tiisaas lalama gacgacmeeyo, kuwa naarta iyo jannadana sidoo kale, wixii awaamir soo baxaya ama waxyigana Jibriilka u sarreeya lalama qaybsado, kii wax loo diro maahee.

# HABKA KHILAAFADA LOOGU DHIIBAY AADANAHA

Koonka oo dhan waxa uu ku siganayaa inuu ku dhawaaqo (wax aan hab maamul lahayni waa iba furka habka burburka), oo waxaa markhaanti uga dhigan kartaa adoo aan danbaabayn, habka Eebe ugu wareejiyey aadanaha maamulka dhulka iyo ka noqoshada khaliif halkan, waxaa laga dhex doortay noolayaasha, waxaana tartan la dhex mariyey asaga iyo cidda ugu dhow ee dhulka maamuli kadhay, doodaasna waxaa guushu ku raacday aadanaha oo aabbohood markaas matalayey, sida aad aragtidna Eebe ma maqnaado mana dhinto, iyadoo ay saas tahayna dhulka cid camirta oo maamusha ayuu u sameeyey.

# NEBIYADA IYO KHILAAFADA AADANAHA

Wax kasta waxay ku socdaan hab quman oo toosan, waxaaba mooddaa in koonka dhan hal silsilad oo is haysata uu ku taaganyahay, oo aadanaha markii loo gardaadin dhiibay dhulka uu ku sugnaa loogama tegin ciyaar iyo jaantaa rogan ee hab uu baraare ku gaaro ayaa loogu soo dhiibay, kuwo iyaga ka mida lana yiri maamula oo barwaaqo aduun iyo mid aakhiraba gaarsiiya, nidaam ku dhisan cadaalad iyo garsoor sharci bayna nebiyadu ama ergayda Eebe gardaadinayeen.

Waxaa la yaab leh xitaa nebiyadaas ama ergaydaas Eebbe haday isku soo gaaraan xilli oo laba nebi ama ka badan hal mar soo wada baxaan, mid labadaas ka mida baa iska leh maamulka meeshaas, mana aha wax is garab yaac ah ama anna nebi baan ahay adna nebi, waxaana tusaale cad aad ka dhigan kartaa, Nebi Muuse iyo Nebi Haaruun, nabadgelyo korkooda ha ahaatee.

# TUSAALOOYIN KOOKOOBAN

Iyadoo faahfaahinta fikrada aysan ku filnayn hal qormo, haddana bal tusaale ahaan aan u soo qaadano sida Islaamku u xoojiyey nidaamka iyo habaynta wax walba oo kooxi wadaagayso.

Islaamku waxa uu amray in dowladda oo ah habka ugu wayn oo koox aadanaha ka midihi ku bahoobi karaan inay ahaato mid hal meel arrinkeedu ka soo fulo, markii laga reebo wixii wadatashi ah oo dhex mari kara kooxdaas isku danta ah, mararka qaar waxaa la amray ninkii fadqalalo iyo foodo aan xaq ku dhisnayn la yimaada, dadkana habkoodii ay ku midoobeen ka kharribaya in meesha laga saaro ama laba dilo.

Taas hore waa kooxda aadana ah ee ugu wayn ee wada noole, tan ugu yarna waxaa la amray in ay maamul samaystaan ama nidaam lagu wada socdo; xataa hadii safar la yahay oo sadex qof la yahay, arinkaasi waa arrin la yaab leh oo dhigaya in Islaamku uusan hallayn arrin yar iyo mid weynba.

Waxaa taas sii adkaynaya in qoyska oo waxa ugu yar oo uu ka koobmaa ay tahay labo qof, loo sameeyey cid laga qaato maamulka qoyskaas, maxaa yeelay koonka dhan baa nidaamsan oo ku taagan hal silsilad xaga kala danbaynta iyo ka fogaanshaha fowdada iyo madax taaga.

Waxaa si cad loo sheegay in fowdada, isqabqabsiga iyo is maandhaafku yahay wadada burburka iyo fashilka, taasina waxay cadayn u tahay in qoloda kala tagsan maan ahaan iyo maamul ahaanba ay yihiin qolo garab martay silsiladii koonka dhan ku taxnaa ee habaysnaanta, nidaamsanaanta iyo kala danbaynta ahayd taasina ay tahay jawaabta ay kala kulmeen Eebihii dejiyey nidaamkaas, oo ka dhigay kuwo uu bubur la derso fashilna agtooda markasta yaal.


Intaad soo akhrisid intaas kore; haddaba u kaalay Soomaaliya. Maxay uga bixi la'dahay farsamo xumada maamul, kala qoqobnaanta, fashilka, iyo damacyada shisheeye mudo soddon sano ka badan?

Ma kula tahay in aan nidaamkii koonka dhan ka jiray garab marnay oo meel cidla ah Soomaalida bes heehaabayaan, rabaanna inay wax koonka dhan ku ah gurrac ama qariib (odd) ku kabaan ama ku dhejiyaan, laakiin uu ku dhegi la'yahay?

Waxaan kusoo koobayaa Islaamku waa diinta ugu badan oo ka hadasha nidaamka iyo isku habaynta arrimaha maamulka iyo ka arriminta maslaxadda dadka iyo noolaha oo dhanba, iimana muuqato in aan intaas sharraxo laakiin waxaan inagu baraarujinayaa bal inaan hoos u fiirinno waxa aan rabno markaan reer reer u hadlayno iyo qaabka lagu gaaro hab iyo nidaam dowladeed.

**W/Q:** Maxamed Nadiif Showkaani

# DOWLAD-DHISKA IYO KU DHAQANKA SHARCIGA



Dr. Maxamed Cali Faarax



**Xigashada Sawirka**: Google

# HORDHAC

Dowlad-dhisku waa abuuridda hay'ado dowli ah oo cusub, ama waa kuwii jiray ee dowladu lahayd oo la xoojinayo. Sidaas daraadeed baa dowlad-dhisku ka mid yahay arrimaha muhiimka ah oo ay bulshada caalamku indhaha ku hayso, iyadoo u aragta in dowladaha fashilmay ama tabarta yari ay yihiin meelaha ay ka timaaddo khataraha, iyo mashaakilaadka faraha badan oo dunidu la daalaa-dhacayso, kuwaasoo ay ka mid yihiin: argagixisada, tahriibinta iyo ka ganacsiga maandooriyaha, dhaqidda lacagta, tahriibinta dadka iyo ka ganacsigooda iyo kuwo kale oo fara badan.

Francis Fukuyama oo ka mid ah Falaasifada ku xeel-dheer siyaasadda ayaa tilmaamay in: "Wax badan laga garanayo dowlad-dhiska, laakiin uu culays badan ka taaganyahay sidii hay'ado xooggan (strong institutions) loo gaarsiin lahaa dalalka soo koroya, way noo fududahay – ayuu yiri - inaan dhaqaale gaarsiinno, laakiin biyo-kama-dhibcaanku waa in la helo hay'ado dowli ah oo si fiican u shaqaynaya".

Dhawr arrimood oo dowlad-dhiska lama huraan u ah ayaan ka hadalnay marar badan, laakiin maqaalkaan waxaan ku iftiiminaynaa tiir wayn oo saldhig u ah dowlad-dhiska, kaasoo ah ku dhaqanka sharciga (Rule of law). Shaqada ugu wayn ee dowlad laga rabo waa samaynta sharciga (inay diyaariso shuruucda bulshada hagaysa), sharciguna waa kan qeexaya awoodaha iyo xuduudaha u dhexeeya bulshada ama dowladda iyo bulshadaba, dowlad kastana waxaa lagu qiimeeyaa hadba siday awood ugu leedahay samaynta sharciyada, fulintooda iyo qaabka bulshada ku hoos nooli ugu hoggaansamayaan una aqbalayaan.

# SHARCIGA IYO DOWLADNIMADA

Sharcigu waa xabagta isku xirta qaybaha kala duwan ee dowladda, dhaqaalaha iyo bulshada, dhamaan qaybahaasna waxaa kala hagaya waa sharciga dalka u deggan oo la rabo in loo hoggaansamo, waana inuu si cad u qeexaa xuquuqaha iyo waajibaadka dhinac walba oo ay dowladdu saamayn ku leeyahay.

Shaqo kasta oo ay oawladdu leedahay, waxaa qeexaya xeerar gaar ah oo dhisaya hab- maamul cad – oo ay ku jiraan xuquuqda go'aan qaadashada, habraacyada, isla- xisaabtanka, xorriyadaha, iyo waajibaadka la xiriira shaqadaas.

Xeerarku waxay leeyihiin laba weji: waxay bixiyaan fursado iyo kheyraad suurtagelinaya hal-abuurnimo, isla markaana waxay dhigaan xadeyn iyo xakameyn ku saabsan dhaqanka bulshada.

Natiijada xukunka sharciga awgeed, muwaadiniintu waxay fahmaan xuquuq iyo waajibaad gaar ah oo qeexaya sida ay ula dhaqmayaan dadka kale iyo sida ay ula macaamilayaan bulshada ballaaran ee dowladdu matasho.

Marka xukunka sharcigu uu si dhab ah uga hirgalo bulshada, wuxuu abuuraa silsilad is- xoojinaysa oo keenta xasillooni la isku hallayn karo, kalsooni, iyo awood-siinta bulshada.

Marka hore, xukunka sharcigu wuxuu xasiliyaa dowladnimada, wuxuuna hubiyaa in dowladda lala xisaabtamo oo bulshadu kaalinteeda qaadato. Marka labaad, wuxuu dhisaa deegaan la saadaalin karo oo qeybaha kale ee bulshada sida ganacsatada iyo ururrada bulshada ay ku samaysan karaan qorshayaal fog fog. Marka saddexaad, wuxuu abuuraa kalsooni shacabka dhexdiisa, kuwaas oo aamina in marka isbeddel loo baahdo, uu ku dhici doono hannaan joogto ah oo xasilloon. Ugu dambayn, wuxuu awood u siiyaa bulshada rayidka ah iyo ganacsatada inay la yimaadaan hal-abuur, sameeyaan ururro, dhisaan shirkado, islamarkaana ay si sharci ah ugu shaqeeyaan gudaha dowladnimada.

Xukunka sharcigu wuxuu beddelaa dabeecadda siyaasadda, wuxuuna ka dhigaa mid wadareed oo iskaashi ku dhisan halkii ay ahaan lahayd mid kala qaybisa. Dadku way kala duwanaan karaan fikrad ahaan, balse khilaafaadkooda waxaa lagu xalliyaa hab nabadeed oo sharciyasan. (Fixing failed nations: Ashraf: P 125-127).

Marka la eego geeddi-socodka dowladnimada Soomaaliya, laga soo bilaabo xilligii daakhiliyada la qaatay ilaa maanta oo ay kusii dhawaanayso todobaataneeyo sano, waxaa muuqanaysa marwalba Soomaalidu inay ka dhutinayayso ku dhaqanka sharciga, dhacdooyin badan oo taariikhda galay ayaa sheegaya in madaxda Soomaalidu mar hore iyo mar dambeba ku liiteen ku dhaqanka iyo fulinta shuruuucda dalka u deggan oo uu ugu sarreeyo dastuurku, iyadoo uu dalka hareeyey musuqmaasuq, qabyaalad, eex, nin jeclaysi iyo danaysi aan loo meel-dayin.

# MAXAA KEENAY IN SOOMAALIDU SHARCIGA ILAALIN WEYDO?

Bulshada Soomaalidu waxay u abaabulan tahay qaab qabiil iyo tolnimo, waana dhaqan laga soo waariday nolosha miyiga iyo xoolo raacatada, waa dhaqan qabiil walbaa deganyahay deegaan u gaar ah, mana jirto wax dan-guud iyo maslaxo ka dhaxaysa qabaa'ilka wada dega deegaan gaar ah. Soomaalidu markii ay magaalo degeen oo ay dowlad yagleeleen, waxay soo min-guuriyeen dhaqankii miyiga, lamana abuurin qaran dowladnimo horseeda.

Dal waxaa dal ka dhigaana "waa wada lahaanshaha uu kaga dhexeeyo dadka ku nool oo aan ugu kala soocmin qabaa'il iyo reero, balse uu qof waliba ka yahay muwaadin ku noolaan kara meeshii uu doono, xuquuqdiisana ku heli karo. Waxaa kale oo muhiim ah

in la helo dowlad dalkaas sida uu u dhan yahay ka talisa oo xukunkeedu ka wada fulo" (Dhaliisha Dhaqanka: 202).

Sidoo kale, dal wuxuu ku taaganyahay oo saldhig u ah qarannimo, "waxayna ku hirgashaa sharci iyo kala dambayn. Kooxda ay isku xirto tolnimadu ma taqaan xeer iyo shaci dadka qof walba qabta, xeerkeedu wadarta mid ahaaneed ee tolka ayuu ilaaliyaa, marka xeerkaas soo galo xiriirka bulshada qarannimo, waxa uu u hiiliyaa qofka dembiga qaba, kooxda tolka ahina dembi-qabahaas bay u hiilinaysaa, waxayna taasi keenaysaa sharciyaddii dowladdu ku dhisnayd oo burburta" (Dhaliisha Dhaqanka: 202).

Ku dhaqan la'aanta sharcigu waxay dalka geyaysiisay xasillooni darro siyaasadeed oo abuurtay rabshado iyo dagaallo muddo dheer socday, waxaa lumay kalsoonidii bulshadu ku qabtay dowladda, waxaana bilaabmatay inay abuurmaan hay'ado sharci oo barbar socda kuwa dowladda, kuwaasoo looga kalsooni badanyahay kuwa dowladda, sida Garsoor-dhaqameedka, Culimada Taxkiimka iyo Maxkamadaha xagjirku ay abuureen oo ay dadka ku kala saaraan.

Ku dhaqan la'aanta iyo fududaysiga sharciga dalka u daggan oo shareecada iyo dastuurka lagu heshiiyey u mudanyihiin, taasoo ay u dhanyihiin madax iyo shacabba, waxay dalka geyaysiinaysaa burbur saameeya dhinac walbaba, waxaana ugu dambayn dalkeennu gacanta u galayaa cadow mudda badan sheedda ka ilaashanayay, sugayayna inay soo marto fursadda la siiyay.

Bulshada Soomaaliyeed waxaa la gudboon inay hurdada ka kacaan, kaalinta uga beeganna ka qaataan ilaalinta dowladnimada iyo la xisaabtanka siyaasiyiinta xukunka lagu aaminay iyo kuwa mucaaradka la magac baxay ee raba inay iyaguna markooda darka ka cabbaan, dadka Soomaaliyeedna ku beer-laxawsadaan ballan-qaadyo afka baarkiisa aan dhaafsiisnayn, shacabku iyagaa dowlad ah haddii ay gartaan awoodda ay u leeyihiin toosinta hannaanka siyaasadeed ee qalloocday, in tubta saxda ah lagu soo celiyaana ay adkaatay.

Allaa mahadleh,

**W/Q:** Dr. Maxamed Cali Faarax

# XASAASIYADA SIYAASADEED EE SOOMAALIYA EE KA DHALATAY E-VISA

## KHILAAFKA CUSUB EE DOWLADDA FEDERAALKA IYO MAAMULADA SOOMAALIYADA



Cabdiraxmaan Shiikhdoon




Xigashada Sawirka: AI

## HORDHAC

Dhowaan waxay Dowladda Federaalka Soomaaliya dhaqan gelisay adeegsiga dal-ku-galka elektarooniga ah (e-visa), taas oo meesha ka saartay in dal-ku-galka laga qaato garoomada Soomaaliya ee ay dadka ajaanibta ah iyo dadka Soomaaliyeed ee sita baasaboorrada dalalka shisheeye ka degaan ee ku yaala magaalada Muqdisho iyo magaalooyin ku yaala Somaliland iyo Puntland. Arrintani waxa ay dhalisay muran siyaasadeed oo cusub oo soo kala dhexgalay Dawlada Faderaalka iyo maamulada Somaliland iyo Puntland. Sidoo kale, waxa ka dhasay caqabado ay la kulmeen dadka socdaalka ah, sida in ay dib uga dhacaan safarkoodii (e-visa oo daahda, ama ay diidaan qaadashadeeda), in laga qaado labo lacagood (dadka ka soo dega Somaliland iyo Puntland), in dal-ku-galka lagu bixiyo lacag ka badan mida ay dowladdu u jaangoysay, iyo dad arrimo siyaaseed dartood uga baaqaday inay tagaan Soomaaliya. Siyaasiyiinta mucaaradka qaarkood ayaa arrintan ku tilmaamay mid dano dhaqaale laga leeyahay oo dad gaar ah lagu naas-nuujiyey. Fal-celinta Dowladda Federaalka ayaa ku koobnayd sheegashada xaqa ay u leedahay bixinta dal-ku-galka, iyada oo indhaha laga laabtay dhibaatada ka dhalatay adeegsiga dal-ku-galka elektarooniga ah. Arrinta socdaalka, duulista hawada, iyo jinsiyada ayaa ah shaqada ay wadaageen Dowladda Federalka iyo maamullada Soomaaliya oo uusan weli raad weyn ku yeelan khilaafaadka siyaasadda iyo kala aragti duwanaanshaha. Dhinaca Kalena, dalalka reer galbeedka qaarkood ayaa walaac ka muujiyey jabsashadii xogtii dal-ku-galka elektarooniga ah ee Soomaaliya. Qoraalkani, waxa uu si kooban u eegaya xasaasiyadda siyaasadeed ee ka dhalatay hirgelinta dal-ku-galka elektarooniga ah iyo raadka ay ku yeelatay dadka u socdaala Soomaaliya ee ajaanibta ah ama Soomaalida sidata baasaboorrada dalalka shisheeye.

## BIXINTA DAL-KU-GALKA

Ma ahaa arrin muran ku jiro in ay Dowladda Federalka Soomaaliya ay xaq u leedahay bixinta dal-ku-galka, marka laga eego dhinaca sharciga, hase yeeshee, waxaa arrintaas sharci daro ku tilmaamay wasiirrada duulista hawada ee Somaliland (Cabdiraxman Maxamed) iyo Puntland (Cabdulaahi Bile). Dowlad kasta oo bixisa dal-ku-galka waxa ay isku dheelitirtaa amniga qaranka, danaha dhaqaalaha, maareynta socotada iyo xiriirka dalalka kale. Dalalka dunidu siyaabo kala duwan ayey u bixiyaan dal-ku-galka. Marka laga eego dhinaca dhaqaalaha, dalalka qaarkood waxa ay tixgeliyaan dhaqaalaha laga helayo dal-ku-galka (visa cost), sida dalka Sacuudiga oo bixiya adeega dalk-ku-galka elektarooniga ah, isaga oo haysta fursad ay dad tiro badan oo Muslimiinta ah oo gudanaya Xajka iyo Cimrada ay dalka Sacuudiga booqdaan sannad kasta, taas oo Sacuudigu u arkay in ay tahay ilo-dhaqaale oo kor u qaadaysa wax-soo-saarka guud ee gudaha (GDP). Kenya ayaa bilowgii 2024, soo saartay adeegsiga dal-ku-galka elekarooniga ah, taas oo ay uga gol-lahayd in lagu kobciyo dhaqaalaha dalka, laguna soo jiito dalxiiska iyo maalgashiga, iyada oo la fududeynayo adeegga bixinta dal-ku-galka oo qofku si fudud ku heli karayo. Arritaas, ayey weli doodi ka jirtaa sida ay uga qayb qaadatay kobaca dhaqaalaha iyo fududeynta dalk-ku-galka. Dhinaca kale, waxa jira dalal ka eegay dhaqaalaha lacagta uu qofka socotada ah uu dalka soo gelinayo, iyaga oo qaatay siysaad ah in qofka socotada ah laga siiyo dal-ku-galka halka uu dalka ka soo galo, iyada oo laga qaadayo khidmad ama khidmad la'aan. Dhinaca xiriirka dibada, ayaa isna keenaya dalalka ay xiiriirka siyasaadeed ama goboleed ka dhexeeyo ay dal-ku-galku noqdaan kuwo lacag la'aan ah oo si fudud loo helayo. Tusaale ahaan, dalalka ku bahoobay Iskaashiga Bariga Afrika (EAC) waxa ay dadkooda u fududeeyeen isku socodka, iyada oo looga dan leeyahay korarka dhaqaalaha, iskaashiga iyo is-dhexgalka bulshooyinka.

## XAGEE LAGA EEGAY BIXINTA DAL-KU-GALKA ELEKTAROONIGA AH EE SOOMAALIYA?

Haddaba, maxay ku salaysay in Dowladda Soomaaliya soo dedejiso bixinta adeegga dal-ku-galka elektanooniga ah? Soomaaliya ma aha maanta dalka ay dunidu u soo jeeddo inay ka sameeyaan maalgashi, marka laga reebo dowladaha maalgashaday dekadaha iyo garoommada dalka qaarkood. Sidoo, kale Soomaaliya ma ahan maanta meel loo soo

dalxiis tago, oo ay dadku u safri karaan si fudud. Maanta, inta badan, ma jiro qofka jooga Muqdisha oo gaari ku tagi kara  magaalooyinka ku xeeran Muqdisho. Dhinaca kale, dadka ugu badan ee ay arrinta dal-ku-gulku raadka ku yeelanayso waa dadka Soomaaliyeed oo sita baasaboorrada dalalka shisheeeye, kuwaas oo dalka si joogta ah ugu soo noqnoqda. Sida uu sheegay siyaasiga Warsame, arrintani waa mid ku salaysan dano dhaqaale oo dad gaar ah helayaan, maadaama ay jiraan dad kale oo ka macaashaya qabashada lacagaha dal-ku-galka oo aan dowladda ahayn.

Waa arrin markasta ay ka dhalanayso natiijo gurracan marka ay dowladu hal dhinac oo keliya wax ka eegto, sida in ay eegto oo keliya waxa ay awoodda u leedahay, iyada oo aan la eegin waxa waajibka loogu leeyahay. Bal u fiirso, gadiidkii badeecadaha ka qaaday dekada Muqdisho oo madax-furasho loogu haysto meel 90 km u jirta Muqdisho. Xaaladaas oo kale, waa in ay dowladdu isku dheelitirtaa gudashada waajibaadkeeda iyo adeegsiga awoodaha sharciga ah oo qabanaya dadka ku jirta xayndaabka awoodda dowladda.

Waxa jirta aragti siyaasadeed oo ka hadlaysa is-bedelka bulshada, taas oo ah Kobac iyo Kacaan (Evolution and Revolution Theory). Aragtida ah in ay bulshadu ay isku bedesho si tartiib ah (evolution) waa mid looga baahanyahay dalka kala qoqoban oo u baahan in la isku soo celiyo. Is-bedelka ku dhisan kacaanka (Revolution) waa mid aysan aqbali karin bulsho burburtay, taas oo keenta khilaaf, mucaarad iyo duminta nidaamkii jiray. Aragtida kacaanka, waxa loo bixiyey 1960-dii, dalgaalka gudaha (Internal war), taas oo loogu magac daray dhibaatada ka dhalanaysa. Tusaale ahaan, kacaankii ka curtay Soomaaliya, waxa uu dumiyey dhamaan nidaamkii ka jiray dalka, waxa uuna abuuray khilaafaadka ilaa maanta ka jira dalka, oo ka dhashay iska caabbin bulsho. Haddaba, arrinta dal-ku-galka elektarooniga oo dhalisay xasaasiyadda siyaasadeed, waxa loo baahnaa in ay si tartiib ah u dhaqangasho ayna noqoto qorshe dowladeed oo horay loo qorsheeyey.

## MAXAA KA DHASHAY BIXINTA DAL-KU-GALKA ELEKTAROONIGA AH EE SOOMAALIYA?

Qaadashada iyo sharciyada adeegsiga ee dal-ku-galka elektarooniga ah ee Soomaaliya ay si ballaaran u hirgashay oo ay wada aqbaleen shirkadaha diyaaradaha, hay'adaha duulista ee caalamiga ah iyo dalalka dunida. Waxa kale oo ay tillaabadani mujinaysaa dowladanimada Soomaaliya. Dhinaca kale, soo saarista adeegga dal-ku-galka ee elektarooniga ah waxaa ka dhashay dhowr caqabood oo u baahan in xal laga gaaro:

1. Khilaafka siyaasadeed ka dhexeeya Dowladda Federaalka iyo Maamullada Somaliland iyo Puntland, oo aad uga carooday soo bixista adeegga dal-ku-galka elektarooniga ah. Arrintaas waxaa sii huriyay, Dowladda Federaalka oo hakisay dagenaasho laga bixin jiray Somaliland iyo Puntland, kuwaas oo ay qaadan jireen dad badan oo Ajnabi ah oo jooga maamulladaas. Taasi, waxaa ay caqabad ku tahay dadka shaqaalaha hoose ee ka shaqeeya dhismayaasha iyo hoteellada oo aan daganaasho u doonan karain Muqdisho iyo dadka kale ee ajaanibta ah ee jooga Hargeysa iyo Garoowe. Talaabadani, waa mid ragaadinaysa is fahanka siyaasadeed ee Dowladda Federaalka iyo maamullada Soomaaliya iyo wada-hadalladii Soomaaliya iyo Somaliland oo looga gol-lahaa in la gaaro is-fahan siyaasadeed oo soo af-jara khilaaf muddo dheer soo jiray.
2. Dadka ka dega maamullada Somaliland iyo Puntland oo laga qaado labo-lacagood, taas oo ah in maamullada Puntland iyo Somaliland aysan ogolaan dal-ku-galka ay bixiso Dowladda Federaalka ah. Arrintani waa mid u baahan wada-hadal siyaasadeed iyo dhaqaale qaybsi, maadaama garoommada iyo dal-ku-galka ay lacag ka helaan maamullada Somaliland iyo Puntland, haseyeeshee aan la sheegin qorshaha dhaqaalaha ee ka soo xeroonaya dal-ku-galka ee dib loogu soo celinayo Somaliland iyo Puntland, si culayska looga qaado dadka laga qaado labada lacagood oo inta badan dad Soomaali ah.

3. Cabsida laga qabo in la helo xogta dadka, taas oo ah mid ka mid ah qodobbada la tixgeliyo marka la sameynayo nidaamka dal-ku-galka elektarooniga ah. Walaacaas waxaa sii xoojiyey, ka dib markii la jabsaday xogtii dal-ku-galka. In kasta oo ay Dowladda Soomaaliya sheegtay in wax laga qabtay, uuna socdo baaritaan cidda ka dambaysay, haddana arrintaasi meesha kama saarin cabsidii ka jirtay bed-qabka xogta.
4. Si dadka looga qaado lacag hawl-fududeen ah, waxaa daaha helista dal-ku-galka, taas oo keenta in qofka laga qaado lacag aan u xaroon dowladda.
5. Waxa jirta cabsi laga qabo, in dadka siyaasiyiinta ah oo inta badan wata baasaboorro dalal shisheeye loo diido in la siiyo dal-ku-gal ay ku soo galaan dalka. In kasta oo ilaa iyo hadda aysan dhicin arrintaas, haddana waa fal horey uga jiray dalka sida, in dad siyaasiyiin ah loo diido in ay tagaan Kismaayo ama Baydhabo.
6. Caqabada kale oo iyana iman karta waa arrinta la xiriirta sida ay dadku aqoon ugu leeyihiin adeegsiga kumbuyuutarka (digital literacy) taas oo dad badan ku keeni karta inay cid kale lacag ku siiyaan buuxinta foomka dal-ku-galka.

## GABOGABO

Arrinta ku saabsan adeegga dal-ku-galka elektarooniga ah ee ay dhowaan soo rogtay Dowladda Federaalka Soomaaliya, waa mid ay hadal hayn badan ka dhalatay, gaar ahaan dhinaca siyaasadda maamullada ka hor yimi iyo dadka dhibta kala kulmay helidda adeeggan. Sababta ugu weyn ee keentay waa kala qaybsanaanta siyaasadeed ee ka jirta dalka, la-tashi la-aanta iyo sal-fudeydka deg-degga ah ee gaarista go'aannadda siyaasadeed oo uusan xamili karin dal burbur ka soo kabanaya. Waa arrin tixgelin u baahan, in arrimaha siyaasadda ee la qaadayo ay fulaan si aan dhib ka iman (Do no harm), taas oo ah in fulinta siyaasadda iyo qanaca bulshadu ay isla socdaan. Si caqabadaha jira wax looga qabto, waa in uu jiraa nidaam cabasho oo uu soo gudbin karo qofka ay ka daahdo helidda dal-ku-galku iyo hufnaan ku saabsan in aan cidna arrimo siyaasadeed darteed dal-ku-gal loogu diidi karin. Si culayska looga qaado dadka laga qaadayo labada lacagood, waa in ay Dowladda Federaalka ah dib u eegtaa saami-qabsiga dhaqaalaha laga helo dal-ku-galka. Ilaalinta xogta ayaa ah arrinta aan marna laga gorgortami karin, taas oo u baahan farsamo iyo khibrad lagu ilaalinayo xogta dadka soo galay xerada bixinta dal-ku-galka. Arrinta xalkeedu waa in aysan noqon sida uu cabiray abwaan Shaacir oo matalaya madaxweyne Xasan Shiikh:

***"Bada iyo cirkaan xiray***
***Haddii lagu buuqana***
***Berrigaan ku darayaa***
***Baawarkiyo awoodiyo***
***Sharcigay baneeyoo***
***Dalka laga bixi karo"***

W/Q: Cabdiraxmaan Shiikhdoon























**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG